**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** **REPUBLIC OF SOMALILAND**

## XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
## SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| | | |
|---|---|---|
| *Sananadka 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *05/03/2022* |



# XEERKA SAHAMINTA IYO SOO-SAARISTA SHIDAALKA XEER LR.95/2021


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Lama iibin karo*
*Not for sale*


*Sannadka 2022*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-830/022022 Taar: 13/02/2022

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Sahaminta iyo Soo-saarista Shidaalka, Xeer Lr. 95/2021**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 38aad, 76aad, 77aad, 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr.GW/KF-02/925/2022, ee ku taariikheysan 29/01/2022, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Sahaminta iyo Soo-saarista Shidaalka, Xeer Lr. 95/2021;

Waxaan soo-saaray;

Dhaqan-galka Xeerka Sahaminta iyo Soo-saarista Shidaalka, Xeer Lr. 95/2021;

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-02/925/2022 Date: 22/01/2022

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Sahaminta iyo Soo Saarista Shidaalka Xeer Lr. 95/2021**

**GOLAHA WAKIILADU**

**Markuu Arkay:-** Qodobka **12aad, 75aad, 76aad, 77aad iyo 78aad** ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay:-** Ahmiyadda dhaqaale, siyaasadeed iyo bulsho ee Sahaminta iyo soo saarista shidaalku u leeyihiin horumarka iyo taabba-gelinta dhaqaale si dalku isku filnaansho u gaadho.

**Markuu ku Qancay:-** In baahi weyn loo qabo xeer si faah-faahsan u qeexa Shidaalka Dalka sida loo Sahaminayo iyo sida loo soo saarayo in la helo.

**Markuu Arkay:-** Qabyo-qoraalka Xeerka Sahaminta iyo Soo saarista Shidaalka oo ay Xukuumadu Golaha u soo gudbisay.

**Markuu dhageystay:-** Warbixinta Gudidda Golaha u qaabilsan Kheyraadka Dabiiciga iyo Deegaanka oo Wax ka badal iyo Kaabis ku soo sameysay, sidoo kalena ay Mudanayaasha Golaha Wakiiladdu ka dooddeen.

Website: www.somalilandparliament.net

**Markuu Arkay**: Go'aanka Ansixinta Sahaminta iyo Soo Saarista Shidaalka , **Xeer Lr. 95/2021** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **08/02/2021** kalfadhigii **44aad** fadhigiisi **33aad.**

**Markuu Arkay**: In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen afartan **(25)** cod xeerka Sahaminta iyo Soo Saarista Shidaalka , **Xeer Lr. 95/2021** , kuna taariikhaysnaa **12/04/2021**

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **48 cod** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Sahaminta iyo Soo Saarista Shidaalka (Xeer Lr. 95/2021)**.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Cabdirisaaq Khaliif Axmed** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** | **Guddoomiyaha GolahaWakiilada** |

GOLAHA WAKIILADA JAMHUURIYADA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILADU

**Markuu Arkay: -** Qodobka **12**$^{aad}$**, 75**$^{aad}$**, 76**$^{aad}$**, 77**$^{aad}$ **iyo 78**$^{aad}$ ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay: -** Ahmiyadda dhaqaale, siyaasadeed iyo bulsho ee sahaminta iyo soo saarista shidaalku u leeyihiin horumarka iyo taabbagelinta dhaqaale si dalku isku filnaansho u gaadho.

**Markuu ku Qancay: -** In baahi weyn loo qabo xeer si faah-faahsan u qeexa shidaalka dalka sida loo sahaminayo iyo sida loo soo saarayo in la helo.

**Markuu Arkay:** - Qabyo-qoraalka xeerka sahaminta iyo soo saarista shidaalka oo ay xukuumadu Golaha u soo gudbisay.

**Markuu dhageystay: -** Warbixinta Gudidda Golaha u qaabilsan kheyraadka dabiiciga iyo deegaanka oo wax-ka-beddel iyo kaabis ku soo sameysay, sidoo kalena ay mudanayaasha Golaha Wakiiladdu ka dooddeen.

**WUXUU ANSIXIYAY**

**XEERKA SAHAMINTA IYO SOO SAARISTA SHIDAALKA**

**XEER LR: 95/2021**

# TUSMADA XEERKA

**QAYBTA 1AAD: QODOBO GUUD**..........................................9

**XUBINTA 1AAD: ABAADII'DA GUUD** .................................. 9

**Qodobka 1aad: Magaca xeerka**.................................................. 9

**Qodobka 2aad: Erey-Bixin**............................................................ 9

**Qodobka 3aad: Lahaanshaha Khayraadka** .......................... 17

**Qodobka 4aad: Masuuliyada Lahaanshaha**......................... 18

**Qodobka 5aad: Mabaadii'da Maamulka Khayraadka Shidaalka**...................................................................... 19

**Qodobka 6aad: Mabaadii'da Doorka Wasiirka Ee Masuuliyadiisa Nidaaminta**.................................................. 20

**XUBINTA 2AAD** ......................................................................... 21

**Qodobka 7aad: Xadka Adeegsiga** ........................................... 21

**Qodobka 8aad: Kudhaqanka Xeerarka** ................................ 21

**Qodobka 9aad:Ka Qayb Qaadashada Dawladda**................ 21

**QAYBTA 2AAD: GOOBAHA HAWLAHA SHIDAALKA IYO HESHIISKA WADAAGISTA WAX-SOO-SAARKA** .......................................................................................22

**XUBINTA 1AAD: GOOBAHA HAWLAHA SHIIDAALKA** 22

**Qodobka 10aad: Qiimaynta Istiraatijiyada Deegaanka**. 22

**Qodobka 11aad: Khariirada Tixraaca**.................................. 25

**Qodobka 12aad: Kala qaybinta goobaha heshiiska**......... 26

**XUBINTA 2AAD: BAADHISTA**............................................... 26

**Qodobka 13aad: Ruqsadaha Sahanka Hordhaca ah**........ 26

**Qodobka 14aad: Ruqsad Baadhis Gaar ahaaneed** ............ 28

**XUBINTA 3AAD: HESHIISYADA SAHAMINTA IYO WADAAGISTA WAX SOO SAARKA** ........................................ 29

**Qodobka 15aad: Ku dhawaaqista Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka** ............................................ 29

**Qodobka 16aad: Ogolaansho Siin** .......................................... 31

**Qodobka 17aad: Codsiyada Heshiiska Saamiyadda** ........ 31

**Qodobka 18aad: Heshiiska qandaraasyada** ........................ 32

**Qodobka 19aad: Xuquuqaha Qandaraaslaha** ...................... 33

**Qodobka 20aad: Nuxurka Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka** .................................................. 34

**Qodobka 21aad: Hawl-wadeenimo** ......................................... 35

**Qodobka 22aad: Goob iska soo celin** .................................... 36

**Qodobka 23aad: Ka noqosho heshiis goobeed** .................. 37

**Qodobka 24aad: Xaqa in Cid kale dhigato Agabkeeda** .. 37

**Qodobka 25aad: Khayraadka kale ee Dabiiciga ah** ......... 37

**QAYBTA 3AAD: ORUMARINTA, SOO SAARISTA IYO XIDHIDDA**............................................................38

**XUBINTA 1AAD: HORUMARINTA** ........................................ 38

**Qodobka 26aad: Helida iyo Qiimaynta** ................................. 38

**Qodobka 27aad: Qorshaha Horumarinta Goobta** ............. 39

**Qodobka 28aad: Nuxurka Qorshaha Horumarinta Goobta** ................................................................................ 41

**XUBINTA 2AAD: SOO SAARISTA** ......................................... 42

**Qodobka 29aad: Tijaabada Soo Saarista** ............................. 42

**Qodobka 30aad: Sahaminta Dhuumaha Shidaalka ee Berriga** .......... 42
**Qodobka 31aad: Ogolaanshaha Wax-Soo-Saarista** .......... 42
**Qodobka 32aad: Cabiraada Shidaalka** .......... 43
**Qodobka 33aad: Midaynta** .......... 44
**Qodobka 34aad: Hawlo shidaal oo si wada jira loo fulinayo** .......... 45
**Qodobka 35aad: Isticimaalka Gaaska Dabiiciga ah iyo Xadidaadda sii deynteeda iyo Holcinta** .......... 46
**Qodobka 36aad: Ruqsadaha Agabka** .......... 47
**Qodobka 37aad: Xaqa Helidda Dhinaca Saddexaad** .......... 47
**Qodobka 38aad: Adeegsiga saldhiga, degida iyo goobaha laga dhoofinayo shidaalka** .......... 47
**Qodobka 39aad: Tamar bixinta Xaalad degdeg ah** .......... 48
**XUBINTA 3AAD: XIDHIDA GOOBTA HAWLGALKA** .......... 48
**Qodobka 40aad: Joojinta Hawlgalada** .......... 48
**Qodobka 41aad: Qorshaha Xidhitaanka goobta** .......... 49
**Qodobka 42aad: Lacagta dhamaystirka goobta** .......... 50
**Qodobka 43aad: Dib u qaadasho** .......... 50
**QAYBTA 4AAD: UQUUQAHA, CASHUURAHA, CAAFIMAADKA, BAD-QABKA IYO DEEGAANKA ........52**
**XUBINTA 1AAD: AJUURADDA IYO ABAALMARINTA GOOBTA** .......... 52
**Qodobka 44aad: Kirada goobta Sahanka** .......... 52
**Qodobka 45aad: Ajuurooyinka iyo Abaalmarinnada** .......... 52

**Qodobka 46aad: Saamiga qaybsiga** ........................................ 54

**Qodobka 47aad: Qiimaha Shidaalka**........................................ 54

**Qodobka 48aad: Qiimaha Suuqa** ............................................. 54

**XUBINTA 2AAD: CASHUURAHA** ........................................... 55

**Qodobka 49aad: Cashuurta iyo Dhaafida**............................ 55

**Qodobka 50aad: Lacag Bixinta** ............................................... 55

**Qodobka 51aad: Rahanka iyo Diiwaangelinta Xuquuqaha**............................................................................... 55

**Qodobka 52aad: Diiwangelinta Rukhsadaha iyo Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista Wax-soo-saarka** ............................................................................................... 56

**XUBINTA 3AAD: CAAFIMAADKA, BAD QABKA IYO DEEGAANKA** ................................................................... 56

**Qodobka 53aad: Awoodda Caafimaadka, bad qabka iyo Deegaanka**............................................................................... 56

**Qodobka 54aad: Aagaga Badqabka**........................................ 57

**Qodobka 55aad: U diyaargarawga Xaaladaha Deg-dega ah** ............................................................................................. 59

**Qodobka 56aad: Hakin waddanku sameeyo**....................... 60

**QAYBTA 5AAD QODOBADA KALA DUWAN......................60**

**Qodobka 57aad: Shaqada** .......................................................... 60

**Qodobka 58aad: Xuquuqaha Dhulka** .................................... 61

**Qodobka 59aad: Hawlaha wax-ku-oolka ah ee Shidaalka** ............................................................................................... 61

**Qodobka 60aad: Xogta, macluumaadka iyo Warbixiin muunadda iyo Maaraynta** .................................................... 62

**Qodobka 61aad: Dammaanado** ................................................ 63

**Qodobka 62aad: Masuuliyahadaha** ......................................... 63

**Qodobka 63aad: Caymiska** ....................................................... 64

**Qodobka 64aad: Qandraaslayaasha iyo Qandaraaslayaasha labaad** ..................................................... 65

**Qodobka 65aad: La noqosho** .................................................... 65

**Qodobka 66aad: Tababarka** ...................................................... 66

**Qodobka 67aad: Danta Dawladda** .......................................... 67

**Qodobka 68aad: Shuruudaha shirkadaha** ........................... 68

**Qodobka 69aad: Nidaaminta kormeerka iyo Daboolida Kharashka** ....................................................................... 69

**QAYBTA 6AAD: QODOBADA CIQAABTA......................71**

**Qodobka 70aad: Ciqaabaha Xeerka Shiidaalka** ................ 71

**Qodobka 71aad: Xeer-nidaamiyayaal Guud** ....................... 74

**Qodobka 72aad: Tilmaamid khaas ah**.................................. 74

**Qodobka 73aad: Nasakhaad** ..................................................... 78

**Qodobka 74aad: Dhaqangalka Xeerka** ................................. 78

# QAYBTA 1AAD

# QODOBO GUUD

## XUBINTA 1AAD
## MABAADII'DA GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Sahaminta iyo soo Saarista Shidaalka Xeer Lr. 95/2021.

### Qodobka 2aad
### Erey-Bixin

Xeerkan haddii aanu nuxurku si kale u sheegin: -

**"Xeer: -** Waxa loola jeedaa Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo-saaristiisa Xeer Lr.95/2021

**"Xubin:-** Waxa loola jeedaa hay'ad kasta oo sharci ama jismiyeed oo halkan loogu yeedhay sidii shirkad hooyada ah, taas oo si toos ah ama si dadban hubisa ruqsadle, qandaraasle, ama hay'ad kasta oo sharci ku dhisan oo uu si toos ama si dadban gacanta ugu hayso shirkadda hooyada ah, ama shirkad haysata saamiyo ama lahaansho kale oo sharci ku dhisan oo sita wadarta in ka badan 50% ee xuquuqaha cod bixinta ee la' isiticimaalo kulanka guud, ama shirkad gaar ahaaneed oo si dadban gacanta ugu hayso shirkad ama shirkado, haddii tiro shirkada ah la cayimi karo, oo ka farcamaya shirkadda hooyada ah ama shirkado ama ku dhammaanayo shirkad gaar ah oo xidhiidh la leh shirkad kasta, marka laga reebo shirkada hooyada ah ama shirkado si toos ah

ay ugu hayso hal shirkad ama shirkado badan oo hore ugu jirey tirada.

“**Shirkadda hooyada: -** Waxa loo la jeedaa shirkad wayn oo howlo kala duwan qabata lehna faracyo ku howl gala magaca shirkada wayn.

“**Goobta Heshiiska:-** Waxa loola jeedaa qayb kasta oo ka mid ah xuduudda ama lakabka hoose ee dhulka kaas oo lagu galay dushiisa sahaminta iyo soo saarista heshiiska Sahaminta iyo wadaaga wax soo saarka, oo ay shuruud u tahay wax-ka-bedel kasta oo ku yimaada goobtaas in uu waafaq-sanaado qodobbada ka bixitaanka ee ku dhigan xeerkan iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagida wax-soo-saarka;

“**Baloog: -** Waxa loola jeedaa xidhmo dhul ah oo la kala qaybin karo ee ku taala oogada sare ama juquraafi ahaan lagu qeexay xeerkan ama xeer-hoosaadyo waafaqsan xeerkan si loogu isticimaalo tixraac juquraafi ahaaneed;

“**Godan-badeedka berriga xiga**: - Waxa loola jeedaa lakabka hoose ee badda iyo ciidda hoose ee goobaha maraakiibta ee fidsan kana baxsan xuduudda Dhulka (oo ay ku jirto xuduud badeedka) sida ku qeexan Dastuurka iyo xeerka dhaqan-galka ah iyo iyada oo loo eegayo mabaadii’da uu aasaasay xeerka caalamiga ah.

**“Qandaraasle: -** Waxa loola jeedaa hay’ad sharci ku dhisan oo la gashay heshiis sahamin iyo wadaagis wax-soo-saaris dawladda;

“**Sahamin: -** Waxa loola jeedaa hawlaha looga golleeyahay in lagu soo saaro shidaalka oo ay ku jirto hawlaha baadhiseed iyada oo ay la socoto qodidda

sahaminta ceelasha oo halkan loogu yeedho ceelasha qiimaynta iyo hawlaha la xidhidha.

**“Agab: -** Waxa loola jeedaa hal ama in ka badan oo ah qalab rakiban, wershed iyo qalab ama qaab loogu talo galay hawlaha shidaalka oo ay ka mid tahay gaadiidka.

**“Dhulka hoose: -** Waxa loola jeedaa hal ama in ka badan oo qayb ka ah qorshaha horumarinta dhulka hoose.

**“Xukuumad: -** Waxa loola jeedaa Xukuumadda Somaliland;

**“Ruqsad: -** Waxa loola jeedaa xuquuqaha ay siisay xukuumaddu hay’adda u qalanta si ay u fuliso hawlo cayiman oo shidaal si waafaqsan xeerkan;

**“Ruqsadle: -** Waxa loola jeedaa qof kasta, shaqsi ahaan ama koox ahaan kuwaas oo loo siiyey ruqsad hawlo shidaal si waafaqsan xeerkan.

**“Wasiir: -** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.

**“Gaaska Dabiiciga ah: -** Waxa loola jeedaa dhammaan haydra-kaarboonka gaaska ah ee ku guda jirta cadaadiska deegaanka caadiga ah oo uu ku jiro gaaska qoyan, gaasta qalalan iyo gaasta hadhaaga ah kadib marka la soo saaro dareeraha ah haydro kaarbonka ee ka yimid gaasta qoyan;

**“Hawl-wadeen: -** Waxa loola jeedaa qof kasta o fulinaya hawl maalmeedka hawsha shidaalka isaga oo metelaya ruqsadlaha ama qandaraaslaha;

**"Shidaal: -** Waxa loola jeedaa saliid caydhin (qaydhin), gaaska dabiiciga ah ama dareere kasta oo dabiici ah ama gaaska haydara kaarboona ee ku jira ciidda hoose sidoo kalena iyo walxaha kala ee la soo saaray iyada oo ay la socoto haydra-kaarboonkaas;

**"Hawlaha shidaalka: -** Waxa loola jeedaa qorshaynta, diyaar garaynta, rakibidda iyo fulinta dhammaan hawlaha la'xidhiidha kaydka shidaalka oo ay ku jirto baadhidda, sahaminta, horumarinta, soo-saarista, qaadidda iyo sifaynta.

**"Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka: -** Waxa loola jeedaa heshiis ay galeen dawladda iyo qandaraasle si ay ugu fuliyaan hawl cayiman oo shidaal si waafaqsan xeerkan;

**"Keyd Shidaal:-** Waxa loola jeedaa shidaal si dabiici ah oo gaar ah ugu ururay unug jiyoolaji (geological) oo uu xadidday astaamo dhagax, xuduudo qaab- dhismeed iyo hirar-dhagax (straticgraphic), oogada is haysata, ee u dhaxaysa samaysanka shidaal iyo biyo ama isugaynta kuwaas, taas dhamaan shidaalka ku sugan meel kasta uu ku hoos jiro cadaadis ka dhigay dareere ama gaas.

**"Wax soo saar"** Waxa loola jeedaa dhammaan hawlaha la xidhiidha soo saarida keyd shidaal, oo ay ka mid tahay horumarinta, gelin (injection), helidda hore loo mariyay ee la kobciyay, habaynta iyo bedelidda shidaalkii la soo-saaray marka laga reebo hadhaaga la burburiyay, raridda iyo dhammaan shaqooyinka iyo adeegyada kale ee la'xidhiidha.

**"Baadhis: -** Waxa loola jeedaa hawlaha hor dhaca ah ee loo sameeyo si loo qeexo jiritaanka keyd shidaal, iyada oo la isticmaalayo hannaan jiyoologi (geology), midka betroo-fiisicis (petrophysical), dhismaha-dhulka (geophysical), jiyoo-kimisiteriga (geochemical) ama farsamo-dhuleedka (geotechnical), oo ay ku jirto qodidda godod dhaadheer balse aanay ku jirin ceelasha sahaminta.

**"Xeer nidaamiye: -** Waxa loola jeedaa xeer-nidaamaye loo soo saaray si waafaqsan xeerkan;

**"Qaran: -** Waxa loola jeedaa Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland;

**"Xuduud: -** Waxa loola jeedaa xuduudda dalka JSL ee ku qeexan Dastuurka*;*

**"Gaadiid: -** Waxa loola jeedaa ku qaadidda shidaalka dhuumaha iyo hawlaha la hal maala oo ay ku jiraan dhisida, meelaynta hawlgalka iyo isticmaalka agabka looga gol leeyahay ku raridda laakiin aanay ku jirin ku raridda qayb baaxad weyn oo shidaalka ah, gaadiidka badda ama gaadiid dhul haddii aan si kale oo ka duwan loo sheegin.

**"Kayd qiimayn: -** Waxa loola jeedaa hawlaha la qabanayo ka dib marka la helo kayd shidaal, hawlahaas oo ujeedkoodu yahay qeexidda qaabka shidaalka iyo kaydka la helay iyo in la ogaado sida ay ganacsi gal u tahay, waxaana ka mid ah hawlahaas**.**

**(B)** Ceelal la qodo iyo in la sameeyo shidaal soo saar tijaabo ah.

**(T)** Ururinta muunaddo jiyooloji iyo dareere laga soo qaaday kaydka.

**(J)** In la sameeyo cilmi-baadhis iyo sahan lagu helo xog dheeraad ah iyo in la sifeeyo xogtaas.

**"Ceel kayd qiimayneed: -** Waxa loola jeedaa, wixii ceel ah ee laga qodo goobta qandaraaska, helitaanka keyd shidaal ka dib, qodaal-kaas oo ujeedadiisu tahay in la hubiyo tayada iyo baaxadda shidaalka ee kaydka shidaalka ee la'helay.

**"Hannaan-hawleedyadda Bah-weynta Shidaalka ee ugu Wanaagsan ee La heli karo: -** Waxa loola jeedaa hannaan-haw-leedyada ugu wanaagsan ee loo aqbalay inuu fiican yahay, bad-baado yahay, daah-furan oo wax-ku-oolna ah marka la samaynayo hawlaha shidaalka, caalamka oo dhamina si isku mid ah u dabiqi karo.

**"Shirkad:-** Waxa loola jeedaa hay'ad isku-dhafan ama aan isku dhafnayn oo u jirta si waafaqsan xeerka shirkadaha.

***"Saliid caydhin:-*** Waxa loola jeedaa dareere dabiici ah oo ah milan noole ka soo jeeda oo laga helo dhulka hoostiisa oo aan la sifayn.

"**Soo xidhidda goobta hawsha:-** Waxa loola jeedaa ka guuridda, alaab ka raridda iyo ka takhalusidda ama haddii ay khusayso dib-ugu laabashada ceelal, dhuumo, agab, dhismayaal iyo hanti hawlo sahamin iyo soo saaritaan shidaal.

**"Qorshaha xidhitaanka goobta hawsha**:- Waxa loola jeedaa xidhmo hawlo ah oo Shirkaddu soo jeediso oo la

xidhiidha xeerka shidaalka oo la qabanayo marka ay istaagto hawlaha shidaal soo saaridda, si loo raro ama si kale loogu hawlgalo dhammaan qalabka la rakibay, qalabka shaqada, dhuumaha iyo agabka kale, haday ku yaalaan badda ama berriga kuwaas oo loo dhisay ujeedo ah in hawlahaas loo isticmaalo, iyo in dib loogu hagaajiyo dhulkii lagu qaribey hawlahaas.

**"Qorshaha wax soo saar u diyaarinta goobta**:- Waxa loola jeedaa qorshe ku lammaan dalabka ruqsadlaha ee ruqsadda wax-soo-saar u diyaarinta goobta, kaas oo ay ku qoran yihiin hindise faah-faahsan oo ku saabsan dhisidda, samaynta iyo hawlaha dhammaan agabka iyo adeegyada helitaanka keyd shidaal, kala saaridda shidaalka, kaydintiisa, safrinta shidaalka ee goobta la soo jeediyey in la qodo iyo tababarrada iyo shaqaalaynta dadka Somaliland.

**"Helitaanka keyd shidaal:-** Waxa loola jeedaa in lagu ogaado qodaalka ceelka jiritaanka shidaal aan hore loo ogayn inuu jirey, kaas oo ah mid la soo saari karo isagoo dareere ah laguna cabirri karo qaab ay adeegsadaan bah-weynta shidaalku.

**"Qodaal:-** Waxa loola jeedaa daloolinta oogada dhulka iyada oo ujeedkuna yahay in la helo kayd shidaal, islamarkaana la ogaado baaxadda keydkaas ama in lasoo saaro keydkaa shidaal ee la helay**.**

**"Taariikhda dhaqan galka**:- Waxa loo jeedaa taariikhda heshiiska wadaagga sahaminta iyo soo saaridda shidaalku uu dhaqan-galo sida ku qeexan qoraalka heshiiska wadaagga sahaminta iyo soo saaridda shidaalka (PSA model).

**"Shidaal soo saarid la tabantaabiyey: -** waxa la xidhiidha kor u qaadidda cadaadiska keyda iyada oo lakabka shidaal kaydiyaha ah lagu shubayo/buufinayo biyo, gaas, carbon dayogsaydh ama shay kale.

**"Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka: -** Waxa loola jeedaa baadhitaan habaysan oo wacyiga mashruuca la doonayo in la fuliyo ama barnaamij fekerkiisu yahay in la yareeyo ama khafiifiyo saamayntiisa xun, lana kordhiyo saamayntiisa wanaagsan.

**"Qodaal sahamin ah:-** Waxa loo jeedaa qodaal ceelal cusub, qodaallo keyd-qiimayn ah, iyo sidoo kale hawlaha iyo isticmaalka agab hawleed iyada oo loo isticmaalayo sahamin ahaan.

**"Mudo sahamineed:-** Waxa loola jeedaa mudadda loo qoondeeyo in lagu sameeyo hawlaha baadhitaanka.

**"Ceel sahamineed:-** Waxa loo jeedaa ceel la qodo inta lagu jiro xilliga hawlaha sahaminta, kaas oo aan ku jirin ceelasha kayd-qiimaynta, ujeedkiisuna yahay bilaabidda qoditaanka si sahamin ahaan ah oo lagu baadhayo keyd shidaal oo aan hore qodaal u xaqiijin.

**"Wax soo saar u diyaarin goobeed:-** Waxa loola jeedaa qorshaynta, dhisidda iyo rakibidda agabka loogu baahan yahay soo saaridda shidaalka;

**"Holcin:-** Waxa loo jeedaa gudbidda shidaalka iyada oo aan loo adeegsanayn kullaylin ama gaas loo isticmaalayo ujeeddo faa'iido leh.

**"Wasakhayn:-** Waxa loola jeedaa, wixii toos ah ama si dadban ah ee wax ka bedela qaabka, heerkulka,

kiimikada, bayoolojiga ama shucaac oo ku timaada qayb ka mid ah deegaanka, taas oo ka dhalatay ku qubidda ama ku sii deynta qashin ama jabaq dheer, waxyeeladaas oo saamayn xun ku yeelanaysa isticmaal faa'iido leh oo deegaanka ah ama keenaysa xaalado khatar ah oo ku timaadda caafimaadka, badbaadadda iyo xaalad-wanaagga dadka, xoolaha, duur-joogta iyo xayawaanka biyaha ku dhex nool, dhulka iyo biyaha, dhirta, ama keeni kara xanibaad xaaladeed ama xayiraad la'xidhiidha ruqsad lagu bixiyey si waafaqsan xeerkan.

**"Waxyeello wasakhayneed: -** Waxa loola jeedaa waxyeello ama khasaare ay sababtay wasakhayn.

**"Ogolaansho wax soo saar: -** Waxa loola jeedaa ogolaansho lagu bixiyey si waafaqsan qodobka 32aad.

**"Keydin:-** Waxa loola jeedaa in meel lagu hayo laakiin aanay ku jirin meel ku hakin caadi ah oo dhacda xiliga safrinta. (raridda).

**"Sii deynta gaasta**:- Waxa loola jeedaa ku sii deynta gaasta ee hawada sare lagu sii daayo.

***"Qashin:-*** Waxa loola jeedaa wax kasta oo aan faa'iido u lahayn degaanka.

## Qodobka 3aad
## Lahaanshaha Khayraadka

dhammaan shidaalka khayraadka dabiiciga ah ee ku jira inta soohdinta Somaliland gaadhsiisantahay waa hantida dawladda waxaana iska leh dawlada Somaliland oo uga wakiila shacabka sida waafaqsan Qodobka 12aad ee Dastuurka, mabaadii'da xeerka caalamiga ah iyo xeerka

dhaqan-galka ah, iyo iyadoo lagu xadgudbaynin xuquuq kasta oo la bixiyey, la'siiyey, la'helay, la' aqoonsaday ama lagu min guuriyey xeerkan, si loo fuliyo hawlo shidaal.

## Qodobka 4aad
## Masuuliyada Lahaanshaha

Dawladdu waa inay xaqiijisaa hirgelinta siyaasadda shidaalka iyadoo raacaysa xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha waafaqsan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.

Wasiirka ayaana masuul ka ah:

**(1)** Nidaaminta, baadhista shidaalka iyo maamulida khayraadka shidaalka isagoo uga wakiil ah dawladda, waana inuu la yimaadaa xeerar cusub ama kuwo dib loo eegayo hadba sidii loogu baahan yahay.

**(2)** Bixinta rukhsadaha iyo gelidda heshiisyada sahaminta iyo wadaagista wax- soo-saarista isagoo metelaya dawladda si waafaqsan xeerkan,

**(3)** Dabagalka hirgelinta sharciga iyo waajibaadayada heshiisyada.

**(4)** Isku xidhida wasaaradaha kale si ay u hirgeliyaan kormeerka uu siiyey xeer dhaqan-gal ahi.

**(5)** Uga warbixinta Madaxwaynaha iyo Golaha Wasiirradda wixii ku saabsan hawlaha shidaalka si joogto iyo marka ay arin muhiim ahi dhacdo ama hawlaha kale ee loo baahan yahay in lagu hirgeliyo

xuquuqaha iyo waajibaadka si waafaqsan siyaasadda iyo xeerka dhaqan-galka ah.

## Qodobka 5aad
## Mabaadii'da Maamulka Khayraadka Shidaalka

**(1)** Ujeedada xeerkan waa inuu u aasaaso hannaan sharci oo ay xukuumaddu ku maamulayso khayraadka shidaalka ee hoos yimaadda soohdimaha Qaranka.

**(2)** Maamulka khayraadka shidaalka waxaa loo fulinayaa ujeedo muddo dheer leh oo looga faa'iidaynayo dhammaan bulshada Somaliland. Maadaama kheyraadka shidaalka ay leedahay dawlada Somaliland iyada oo ka wakiil ah dadkeeda. Waa in sida ugu faa'iidada badan loo maamulaa marka sida ugu dhakhsaha badan loo soo saaro, looguna beddelo dhaqaale u saamaxa in loo isiticimaalo si waarta dhaqaalaha, kaas oo wax ku soo biirinaya daryeelka, shaqada iyo horumarka dawladda dhexdiisa, iyada oo lagu xisaabtamayo deegaanka, dadka iyo dhinaca saddexaad ee danta ka leh.

**(3)** Maamulka dawladda ee khayraadka shidaalka waa in lagu saleeyaa in uu soo jiito maal geliyeyaal farsamo ahaan u qalma oo leh awood maaliyadeed oo ay ku qabtaan hawlaha shidaalka si loo yareeyo khatartiisa.

**(4)** Hawl-gallo kasta oo lagu qabtay si waafaqsan ruqsad, heshiiska wadaagis sahamin iyo wax-soo-saar ama ogolaansho kale oo ay cid awood u lehi u bixisay si waafaqsan xeerkan, waxaa loo fulinayaa si waafaqsan sharciyadda iyo xeer-nidaamiyayasha la

xidhiidha ee laga yaabo in loo qoondeeyo iyo hannaan-hawleedyadda ugu wanaagsan ee caalamka ee la heli karo ee xaaladdo la garabdhigi karo ee la xidhidha sahaminta iyo soo saarida shidaalka, taas oo ay ku jirto soo saaridda aan dabiiciga ahayn (secondary recovery) iyo ka hortegidda khasaaraynta shidaalka, si kor loogu qaado helitaanka kama dambaysta ah ee shidaal lagaga heli karo goobta.

**(5)** Hawlaha shidaalka ee taxadarka leh waxaa ku jira in la qaado dhammaan tallaabooyinka macquulka ah ee lagu sugayo bad-baadadda, caafimaadka iyo xaalad-wanaaga dadka ku fooggan hawlahaas, iyada oo la ilaalinayo degaanka iyo danaha daneeyayaasha kale, lalana kaashanayo haayadaha shaqada la leh, wuxuuna waafaqsanaan doonaa tilmaamo kasta oo la bixiyey, xadidaadaha la soo rogay ama shuruudaha uu sameeyo Waddanku ee lagu hubinayo, u hogaansannaanta xeerka khuseeya.

## Qodobka 6aad
## Mabaadii'da Doorka Wasiirka Ee Masuuliyadiisa Nidaaminta

**(1)** Wasiirku waa inuu adeegsadaa mabaadii'da daah-furnaanta iyo la xisaabtanka ee masuuliyada nidaamineed, daahfurnaanta waxaa lagu gaadhi karayaa iyadoo si joogto loo baahinayo macluumaadka la xidiidhka hawlaha shidaalka.

**(2)** Wasiirku waa inuu noqdaa dhex-dhexaad oo aanu cidna takoorin.

(3) Racfaannada maamul ee ka dhanka ah go'aanada uu gaadho wasiirku waxaa dib-u-eegaya Maxkamadda Sare waxaana loo raacayaa Xeerka Habka Madaniga.

## XUBINTA 2AAD

### Qodobka 7aad
### Xadka Adeegsiga

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa hawlaha shidaal ee xuduudda Waddanka Somaliland bad iyo beriba.

### Qodobka 8aad
### Kudhaqanka Xeerarka

(1) Shuruucda dawladda, xeer nidaamiyayaasha iyo ogolaanshaha loo helay si waafqasan shuruucdaas iyo xeer-nidaamiyeyaasha waa in lagu dabaqaa hawlaha shidaal ee ka socda dalka oo dhan.

(2) Haddii aan sharci sheegayn inuu khuseeyo hawlaaha shidaalka ee Godan-baddeedka berriga xiga, Golaha Wasiiraddu waxay go'aan ay soo saaraan ka dhigi karaan inuu noqdo mid khuseeya ilaa inta aan waxa uu ka kooban yahay aanay ka hor imanayn waajibaadka sharciyadda caalamiga ah.

### Qodobka 9aad
### Ka Qayb Qaadashada Dawladda

(1) Dawladdu way ka qayb qaadan kartaa hawlaha shidaalka si waafaqsan xeerkan iyadoo yeelanaysa saami loogu muujinayo ruqsadda ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarista si waafaqsan xeerkan.

(2) iyadoo lagu dhawaaqayo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka si wafaqsan xeerkan, wasiirku wuxuu marka uu helo ansixinta Golaha wasiiradda iyo baarlamaanka, cayimayaa saamiga u badan ee dawladdu ay yeelanayso si waafaqsan faqrada 1aad.

(3) Marka uu ansixiyo Golaha baarlamaanku shirkada saliideed oo dawladu leedahay, waxaa aasaasi kara xukuumadda. soo jeedinta Golaha xukuumadda waa inay sheegta inuu shidaal ku filan oo ganacsi gali kara lasoo saaray si uu u siiyo shirkada sees waara oo ay ugu jirto iskeed mudo dheer, waxana ku jiraya inuu qiimeeyo raadadka ka dhalan-kara samaynta shirkad qaran oo saliideed.

## QAYBTA 2AAD

## GOOBAHA HAWLAHA SHIDAALKA IYO HESHIISKA WADAAGISTA WAX-SOO-SAARKA

## XUBINTA 1AAD
## GOOBAHA HAWLAHA SHIIDAALKA

### Qodobka 10aad
### Qiimaynta Istiraatijiyada Deegaanka

(1) Ka hor inta aan la furin goobaha hawlaha shidaalka, Wasiirka Macdanta iyo Tamarta iyo Wasiirka deegaanku waa inay bilaabaan isla markaana isku xidhaan istiraatijiyadda qiimaynta deegaanka ee waafaqsan xeerarka dalka iyo kuwa caalamiga ah ee ugu wanaagsan.

(2) Istiraatijiyadda qiimaynta deegaanka waa in ay ku jiraan qiimaynta raadka hawlaha shidaalka ee ganacsiga, wershadaha iyo deegaanka iyo sidoo kale dhaqaalaha iyo saamaynta bulshada ee ka iman kara hawlaha shidaalka.

(3) Wasiirku wuxuu ka dalban karaa hay'ado sharci ku dhisan inay hirgeliyaan istraatijiyadda qiimaynta deegaanka, ka hor ama iyada oo shuruud u ah, bixinta ruqsad la bixinayo ama gelida heshiiska sahaminta iyo wax-soo-saarka si waafaqsan xeerkan. Ugu yaraan Wasiirku wuxuu had iyo jeer dalban karaa in cilmi baadhis dhammaystiran la fuliyo si loo xaqiiqsado fahanka deegaanka ka hor intaan la bilaabin hawlaha shidaalka.

(4) Wasiirku waa in uu u gudbiyaa Madaxwaynaha warbixin dhamaystiran oo sheegaysa goobaha laga bilaablayo hawlaha shidaalka iyo raadka qiimaynta ee loo qabtay faqradaha 1aad iyo 2aad.

(5) Wasiirku waa in uu dadweynaha gaadhsiiyaa isaga oo isticmaalaya warbaahinta iyo hababka dhaqameed ee laga tixgeliyo goobahaas marka la bilaabayo hawlaha, waana in uu, gaadhsiiyaa qiimaynta la sameeyey degaan ahaan dadweynaha, masuuliyiinta deegaanka ee ay saamaynayso, wakaaladaha kale ee dawladda iyo ururada ay suurto galka tahay inay si gaar ah u danaynayaan arintaas.

(6) Dhinacyada danaynaya waxay, muddo aan ka badnayn sagaashan (90) maalmood kadib marka lagu dhawaaqo sida ku cad faqrada (5$^{aad}$), ugu gudbin

karaan Wasiirka qoraal ahaan, fikirkooda ku saabsan hawlaha loogu talagalay shidaalka. bulshada waa in lala tashadaa, haddii ay fikirkooda ku dhiibtaan af ahaan waa inay qoraan shaqaalaha dawladdu. Haddii mudadda ay soo jeedinayaan fikirkooda sida ku cad faqraddan aan la waafajin, dawladda waajib kuma aha in uu tix-galiyo arrimahooda.

**(7)** Fikir kasta iyo faalo lagu helay sida ku cad faqrada (6aad) iyo kuwa ka yimaada baarlamaaka waa in dib loo eegaa lanna tixgeliyaa ka hor intaan Golaha Wasiirada go'aan gaadhin, Wasiirkuna aanu ku dhawaaqin in goobtaasi u furantahay hawlaha shidaalka.

**(8)** Haddii ra'yiga iyo feker-soo jeedinta ku qoran farqadda (6aad) ay yihiin kuwo aqbalaad ah, Wasiirku wuxuu bayaaminayaa in goobtaa loo furo hawlo shidaal.

**(9)** Haddii ra'yiga iyo feker-soo jeedinta ku qoran farqadda (6) ay yihiin kuwo diidmo ah, Wasiirku wuxuu ka baaraandegayaa in goobtaa loo bayaamiyo in loo furo hawlo shidaal iyo in aan loo bayaamin in loo furo hawlo shidaal.

**(10)** Haddii mudadda lagu sheegay farqadda (6) dhammaato ka hor inta aan Wasiirku helin wax ra'yi iyo feker-soojeedin ah, Wasiirku wuxuu bayaaminayaa in goobtaa loo furo hawlo shidaal.

## Qodobka 11aad
## Khariirada Tixraaca

**(1)** Wasiirku waa inuu diyaariyaa khariiradda tix-raaca ee lagu muujiyey goobaha juquraafiyadeed ee dhulka ee dawladduna u qaybisay boloogyo u yaal sida ku xusan faqrada 2aad. Haddii loo baahdana boloogyada waxaa loo sii qaybin karaa hirar-dhagax (Stratigraphically).

**(2)** Oogada dhulka waa in loo qaybiyaa baloogyo 30 lool oo miridh iyo 30 dhigood oo miridh xajmi ahaan ah, haddii aan goobaha dhulka ee ku dheggan ama duruufo kale sidaa si ka duwan keensan. Qodobkani kuma yeelan karo saameyn xajmiga goobaha la bixiyey ka hor inta aanu dhaqan-gelin xeerkani.

**(3)** Goobaha ruqsadaha lagu bixiyay ama heshiiska sahaminta iyo wadaagidda wax- soo-saarku waa in la qeexaa sida ay juquraafi ahaan isugu xidhan yihiin. Tix-raaca baloog ee ku xidhan goobta la bixiyey waa inay u shaqaysaa oo keliya sidii tuse halka qaybta ugu muhiimsan ee goobta laga hadlayaa ku taalo. goobta la bixiyey waxay ka koobnaan kartaa hal ama in ka badan oo boloog ama qaybo boloogyo ah.

**(4)** Wax-ka-bedel lagu sameeyey tixraaca balooga ma saamaynayso xajmiga goobaha lagu bixiyay heshiiska sahaminta iyo wadaaga wax soo saarka ee dhaqan galka ah marka xeerkan la ansixiyo. Marka laga reebo tixraaca boloogyada.

(5) Faah-faahinta, xadaynta, baloogyada iyo sawirada tixraaca khariirada si waafaqasan qodobkan waxa lagu tilmaami karaa xeer-nidaamiye.

## Qodobka 12aad
## Kala qaybinta goobaha heshiiska

Wasiirku waxaa uu codsi ka yimi qandaraaslaha, iyada oo loo hogaamsamayo habraacayada lagu qeexay xeer-nidaamiyayaasha, ansixinayaa in qayb goobta heshiiska ka mida la qaybiyo, gaarna loogu bixiyo heshiis sahamin iyo wadaagis wax-soo-Saar.

# XUBINTA 2AAD
# BAADHISTA

## Qodobka 13aad
## Ruqsadaha Sahanka Hordhaca ah

(1) Ka dib marka goob loo furo hawlaha shidaalka, codsiga ka dib, Wasiirku wuxuu shirkadda u qalanta siin karaa ruqsad sahan hordhac ah oo ku cayiman goob qeexan oo xuduudka waddanka gudihiisa ah ama godan-baddeedka berriga xiga si waafqsan xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaasha isaga waafaqsan.

(2) Goobta qeexan ee faqrada (1) kuma jiraan goobaha heshiiska ilaa ogolaansho qoraal ah laga helo qandaraaslaha.

(3) Dalabka ruqsad sahan hordhac ah waxaa loo samayn doonaa hannaanka uu qeexo xeer-nidaamiye, waxaana la raacinayaa kharashka dalabka ruqsadda ee loo qoondeeyey.

(4) Wasiirku wuxuu, ka dib marka dalab loo sameeyo ogolaansho sahan hordhac ah si waafaqsan Qodobka 14aad, ogolaansho u bixin doonaa sagaashan maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka uu helo dalabka, qaabka iyo shuruudaha bixinta ogolaanshahaas waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

(5) Iyada oo loo hogaansamayo Qodobka 14aad, ruqsada sahaminta hordhaca ah waa in aanay noqon mid cid u gaar ah si wasiirku u siin karo ruqsadda sahan hordhac ah codsade kasta oo kale oo doonaya dhulka la qeexay ee la bixiyey.

(6) Ruqsadda sahaminta hordhaca ah waxaa la bixinayaa muddo ilaa 2 sannadood ah.

(7) Ruqsadda sahaminta hordhaca ah ma bixinayso xuquuq mudnaan gaar ah si loogu galo heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax soo saarka.

(8) Wasiirku waxaa uu ku qeexi karaa xeer-nidaamiyeyaal, la xidhiidha hab-raacayadda codsiga, jaangooyada iyo shuruudaha ruqsada sahaminta hordhaca ah iyo bixinta ajuuradda codsiyada iyo ta sannadlaha ah.

(9) Ogolaansho ruqsad sahan hordhac ah waxaa ku qornaan doona: -

(B) Taariikhda la bixiyey ogolaanshaha;

(T) Goobta uu ogolaanshuhu khuseeyo;

(J) Shuruudaha ogolaanshaha lagu bixiyey;

(X) Mudadda xog-xejinta ee xogaha la ururiyey.

**(10)** Waxaa shardi u noqonaysa ogolaasho kasta oo sahan hordhac ah in ogolaansho haystuhu uu nuqul xogta la ururiyey ah u siin doono Wasiirka si lacag la'aan ah.

**(11)** Wasiirku wuxuu dhammaan hawlaha sahanka hordhaca ah ku baahin doonaa luuqadda waddanka iyo saxaafadda waddanka, goobta ogolaanshaha loo bixiyeyna waa inuu ka jiraa xafiis wasaaraddu leedahay ama qof lala xidhiidho oo dadweynuhu xog ka heli karaan ama cabasho u gudbin karaan

**(12)** Iyada oo ku salaysan xeerkan, ogolaansho sahan hordhac ah wuxuu shaqayn doonaa muddo afar iyo labaatan bilood ah oo ka bilaabanaysa taariikhdii la bixiyey, ilaa haddii sidaa si ka duwan ay ku timaado ka noqosho heshiis goobeed ama la noqosho sida ay dhigayaan qodobada 23aad iyo 65aad.

## Qodobka 14aad
## Ruqsad Baadhis Gaar ahaaneed

**(1)** Iyada oo ay shardi tahay in Wasiirku u arko inay lagama maarmaan u tahay si loo aas aaso aasaas ganacsi, si baadhitaanku uga dhaco dhulkaas gudihiisa, Wasiirku wuxuu ka go'an gaadhi karaa habka tartanka qandaraaska furan ee lagu bixinayo ruqsadda baadhista gaarka ah. Habka tartanka furan waxaa loo fulinayaa daah-furnan lagu tilmaamay xeer nidaamiyayaal.

**(2)** Gaarnimada lagu bixiyey sida waafqsan faqradda (1aad) waa in aanu ka badan laba sannadood, waxaanay ku kooban tahay oo ku jira habab baadhis la mid ah.

**(3)** Qodobada 15 (4)aad iyo 15 (5)aad waxaa loo adeegsanayaa ruqsadaha lagu bixiyey baadhis si waafaqsan qaybtan.

## XUBINTA 3AAD
## HESHIISYADA SAHAMINTA IYO WADAAGISTA WAX SOO SAARKA

### Qodobka 15aad
### Ku dhawaaqista Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka

**(1)** Wasiirku wuxuu ugu baaqi karaa cid kasta oo danaynaysa inay ka qayb qaataan wareega tartanka heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ee dhammaan ama qayb ahaan goobaha loo furay hawlaha shidaalka si waafaqsan qodobka 12aad. Ku dhawaaqistu waa in ay cayintaa shuruudaha iyo hannaanka lagu dooranayo qandaraaslayaasha iyo sida ay hawl-wadeenadu u kala horreeyaan. codsadayaashu waa in ay ugu yaraan leeyihiin awoodda maaliyadeed iyo kuwa farsamo oo ay ku fulinayaan waajibaadyadda shaqo.

**(2)** Wasiirku wuxuu ku qeexi karaa ku dhawaaqista si waafqsan faqradda (1) shuruudo gaar ah oo dheeraad ah ama shuruudo ku habboon wareegga dadka ama goob khaas ah.

(3) Baaqa waa in lagu daabacaa faafinta rasmiga, iyo qaybaha kale ee warbaahinta ee gudaha iyo dibeda. Ku dhawaaqistu waa in ugu yaraan si caam ah loo sameeyaa lix bilood ka hor inta aanu dhicin codsigu. Shuruudaha lagu dhawaaqayo codsiga waa inaan la diidin ilaa wasiirku uu ka gaadho go'aan arintaas kasoo horjeeda.

(4) Haddii hore loogu baaqay goob si waafaqsan faqraddaha (1) ilaa (3) oo aan loo helin wax codsiyo ah Wasiirkuna aanu ogayn arin kasta oo cusub oo si weyn u saamaynaya soo jiidashada goobahaas, Wasiirku waxaa uu la furi karaa wada xaajood toos ah, shirkado muujinaya danayn inay ku galaan heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ee goobta la cayimay.

(5) Ka hor inta aanu Wasiirku la bilaabin wada xaajood toos ah dhinaca danaynaya sida waafaqsan faqradda (4) aad, waa inuu ku dhawaaqaa ku talagalka inuu si toos ah ula galo wada xajood. Ku dhawaaqista waa in loo raacaa shuruudaha ku cad faqradda (1aad) ilaa (4aad) marka laga reebo mudadda ugu yar ee codsigu ku dhacayaa in ay tahay 3 bilood.

(6) Haddii si waafaqsan farqadda (4) aad aan codsiyo loo keenin, Wasiirku waxaa uu dhamaystiri karaa wada xaajood tooska ah ee codsadaha. Habka iyo shuruudaha ku qeexan xeerkan ee ku saabsan goobaha lagu bixiyey ruqsado tartan furan, waa in si la mida loogu dabaqaa iyo ilaa xadka wada xaajood toos ahi suurta gal yahay.

**(7)** Golaha Wasiirradda ayaa bixinaya xuquuq gaar ah oo sahamineed iyo wax-soo- saar iyaga oo ku caddaynaya heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo- saarka ee lala galay qandaraaslaha.

**(8)** Wasiirka ayaa bixinaya xuquuq gaar ah oo sahamineed iyo wax-soo-saar iyaga oo ku caddaynaya heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ee lala galay qandaraaslaha.

## Qodobka 16aad
## Ogolaansho Siin

Cidaan dawladda ahayni kama samayn karto hawlo shidaal, marka laga reebo si waafaqsan xeerka dhaqan-galka ah iyo shuruudaha la socda ruqasadda ama heshiiska sahaminta iyo wadaagga wax-soo-saarka.

## Qodobka 17aad
## Codsiyada Heshiiska Saamiyadda

**(1)** Iyada oo aan lagu xad-gudbayn xeerkan, qof kasta oo isku daya in uu soo codsado heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka waa in uu u soo gubiyaa codsi Wasiirka sida waafaqsan ee uu qeexayo xeer-hoosaadku iyo habka tartanka furan ee lagu sheegay ku dhawaaqista soo gudbinta codsiyada iyo xeer-nidaamiyaasha.

**(2)** Codsaduhu waa inuu bixiyaa ajuuradda codsiga ee lagu sheegay soo gudbinta codisiyada maalinta u dambaysa ee dhicidda codsiga. Ajuuradda codisigu waa in ay dabooshaa kharashka dawladu gashay si ay u qiimayso codsiga, oo ay ku jirto kharashka kirada khabiirka ka caawinaya qiimaynta.

**(3)** Kadib taariikhda la soo gebagbeeyo soo gudbinta codsiga heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka. Wasiirku waa inuu sii wadaa qiimaynta una gudbiyaan si ay u ansixiyaan Golaha Wasiiradu codsadaha u qalma in la siiyo goobta haduu jiro.

**(4)** Heshiis iskaashi oo ay galeen shirkado dhawr ah oo loogu talagalay in lagu soo gudbiyo codsi caam ah oo ku saabsan heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax-soo-saarka waxaa loo gudbinayaa Wasiirka. Wasiirku wakhti kasta wuxuu awood buuxda u leeyahay wax-ka beddelka heshiiska iskaashi si uu hubiyo in heshiiyadaasi waafaqsan yihiin ama la jaan-qaadayaan xeerka Waddanka ee khuseeya iyo habka heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax-soo-saarka**.**

## Qodobka18aad
## Heshiiska qandaraasyada

**(1)** Wasiirku iyada oo ay ku xidhan tahay shuruud dib laga sheegi doono, wuxuu bixin karaa isla markaana la gali karaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax –soo-saarka qandaraasle ama koox qandaraaslayaala. goobta heshiiska waa in loo sheegaa si waafaqsan qodobka 17 faqradiisa 3 aad.

**(2)** Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka waa inuu ka koobnaadaa laba weji:-

**B.** Wejiga Sahaminta oo aan ka badnayn 10 sannadood;
**T.** Wejiga soo saarka oo aan ka badnayn 30 sannadood.

**(3)** Wejiga Sahaminta waxaa loo qaybinayaa wejiga bilowga ah ee Sahaminta iyo hal xilli ama in ka badan oo la kordhiyay.

**(4)** Marka uu codsado qandaraasluhu, Wasiirku wuxuu kordhin karaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka mudadda ku cad faqradda (2)aad (b) haddii aanu si kale u ansixin Wasiirku, codsiyada ku saabsan kordhinta waa in la soo gudbiyaa mudo ah 3 bilood ka hor inta aan wejiga Sahamintu dhicin, codsigana waxaa la soo raacinayaa ajuurada lacageed ee khusaysa, ee uu qeexayo xeer-nidaamiye.

**(5)** Marka sababo gaar ahi sidaa keenaan, Wasiirku wuxuu codsi ku saabsan kordhinta heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka mudadda dheeriga ah ee lagu sheegay faqrada (2) (b) ee Qodobkan haddii aanu si kale oo ka duwan u ansixin Wasiirka, codsi ku saabsan kordhintaas waa in la soo gudbiyaa muddo aan ka yarayn 5 sannadood ka hor inta aanu dhicin wejiga soo saaristu.

## Qodobka 19aad
## Xuquuqaha Qandaraaslaha

1) Qandaraaslayaasha heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka waxa ay samayn karaan heshiis wadaagis (joint Venture) kaas oo qandaraasle kasta uu leeyahay saamiga uu boqolkiiba kaga qayb galay oo is wata oo aan kala qaybsanayn.
2) Qandaraasluhu, isaga oo u hogaansamaya qodobada xeerkan, xaq wuxuu u leeyahay inuu fuliyo hawsha shidaalka, waxaanu fulin karaa hawlaha sida ugu

dhakhsaha badan ee goobta heshiiska. Adeegsiga xuquuqahaas ee qandaraaslaha waxaa ay u hogaansamayaan xadidaado iyo shuruudo goobaha cayiman ee ku saabsan hawlaha cayiman oo uu qeexi doono xeerkan, xeer nidaamiye iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka.

3) Iyada oo loo hogaamsamyo qodobbada xeerkan qandaraaslaha waa in loo ogolaadaa inuu ka soo dhoofiyo shidaal Somaliland kaas oo uu xaq u leeyahay isaga oo raacaya shuruudaha ku xusan heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka.

## Qodobk 20aad
## Nuxurka Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka

**(1)** Nuqul Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax-soo-saarka oo laga eegan karo hab-raaca loo qoro, waa in laga dhigaa waxa la heli karo ugu yaraan seddex bilood ka hor wakhtiga uu dhacayo soo gudbintu ee ku cad Qodobka 17aad xeerkan.

**(2)** Heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka waxaa uu qeexayaa xuquuqaha iyo waajibaadyadda qandraaslaha ee ku aadan waddanka iyo qandaraaslayaasha, waana inay ka koobanyihiin waxyaabahan soo socda oo ku gaara goob walba oo heshiis lagu galay:

**b.** Goob sugayaal Juqraafiyeed ee lagu bixiyey heshiiska goobta;

**t.** Hadii ay jiraan dhawr qandraasleh, u qoondaynta danta ka qayb qaadasha u dhexeeye qandaraasalayaasha.

**j.** Mudadda heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka weji kasta ee lagu sheegay, waafaqsana Qodobka 18aad (2) ee xeerkan.

**x.** Waajibaadka shaqo ee ugu yar iyo balan qaadka kharash ee ku saabsan wejiga Sahaminta.

**Kh.** Qodobbo khuseeya ka qayb-qaadasho kasta oo waddanku ka Qayb-qaadanayo.

**d.** Qodobka ku saabsan xaalada deegaanka ee khuseeya arrimaha khaaska ah ee goobta la bixiyay.

**(3)** Heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka waa in laga wada hadli karaa iyada oo la eegayo shuruudaha maaliyadeed ama arrimaha dhaqaale qaybaha lagu sheegay xeer-nidaamiyaasha ama ku dhawaaqista soo gudbinta codsiyada.

**(4)** Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista wax soo saarka lagama wada xaajoon karo waxa khuseeya qodobadda lagu sheegay xeerkan iyo xeer nidaamiyayaasha isaga waafaqsan.

## Qodobka 21aad
## Hawl-wadeenimo

**(1)** Qandaraasle oo keliya ayaa loo magacaabi karaa hawl-wadeen. shuruudaha looga baahanyahay hawl-

wadeenka ee ka badan kuwa looga baahanyahay qandaraaslaha waxaa xeerinaya xeer-nidaamiye.

(2) Wasiirka ayaa ansxinaya magacaabista hawl wadeenka marka uu gelayo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka islamarkaan lama beddeli karo hawl wadeenka iyada oo aanu ansixin Wasiirku.

## Qodobka 22aad
## Goob iska soo celin

**(1)** Heshiis wadaagista sahaminta iyo wax-soo-saarka waxa lagu sheegi doonaa ka noqoshadiisu in ay ku salaysnaato wajiyo goobta heshiiska wax ka mid ah la celinayo, ka dib marka uu dhamaato mudadda sahaminta bilowga ah ee lagu sheegay heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax-soo-saarka iyo ka dib mudadda dheeraadka ah ee la kordhiyay.

**(2)** Goob kasta oo heshiis loo haystey oo loo soo celinayo si waafqsan shuruudaha heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax-soo-saarka waa in ay sida ugu suurtagalsan u ahaataa mid xajmigeedu isku dhegan yahay, cabbirka iyo qaabkeeduna saamaxaan in si wax ku- ool-ah goobta la soo celiyey loogu fulin karo hawlo shidaal iyo in goob soo celintaasi waafaqsanaato xeer-nidaamiyayaal.

**(3)** Goobta heshiiska ee qandaraasluhu uu sii haysanayo marka uu dhammaado wakhtiga sahaminta waa in ay sida ugu suurtagalsan ugu jiraan kaydadka shidaalka ee dhammaan meelaha wax laga helay ee ka mid ah goobta heshiiska lehna cabbirka iyo qaabka Wasiirku ansixiyo, marka laga reebo haddii sidaa si ka duwan

lagu sheegay heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax-soo-saarka.

## Qodobka 23aad
## Ka noqosho heshiis goobeed

Qandaraasle wuxuu soo celin karaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax- soo-saarka, keliya marka waajibka u yar la fuliyay iyo waajibaaka kale ee maaliyadeed ee dawladdu leedahay ee ay ku jiraan cashuuraha si buuxda loo bixiyay.

## Qodobka 24aad
## Xaqa in Cid kale dhigato Agabkeeda

(1) Qandaraalsuhu kama hor istaagi karo dhigidda dhuumaha ama xadhkaha ama agab kale gudaha ama oogada goobta heshiiska marka dhigidda dhuunta, xadhiga ama agabka kale uu anxiyay wasiirku,

(2) Agab kasta oo mar dambe la dhigay kuma keeni karo ku habboonnaansho la'aan adeegyadii ka jirey goobta ama hawlo kasta oo shidaal oo la bilaabay.

(3) Qodobkan farqadda hore waxa loo adeegsanayaa si la mida marinnada daruuriga ah iyo qiimaynta ciidda ka hor inta aan la dhigin agabka.

## Qodobka 25aad
## Khayraadka kale ee Dabiiciga ah

(5) Haddii khayraad kale oo dabiiciga laga helo gudaha goobta ama goobaha ay koobayso ruqsadu, qandaraasluhu ama ruqsadluhu waa in uu sida ugu

dhakhsaha badan ugu war-geliyaa Wasiirka sida uu qeexayo xeer-nidaamiyaha xeerkan.

**(6)** Heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax-soo-saarka ama ruqsadi ma hor istaagayo xuquuq u siinta cid aan qandaraaslaha ahayn inuu sameeyo hawlo la'xidhiidha khayraad dabiiciga ah oo aan ahayn shidaalka, haddii aanay hawlahaasi ku keenayn ku habboonnaansho la'aan macquul ah hawlaha shidaalka ama agabyadii jirey. Taas waxa la mid ah hawlaha loo adeegsanyo ujeeddooyin cilmi baadhis aqooneed.

## QAYBTA 3AAD
## HORUMARINTA, SOO SAARISTA IYO XIDHIDDA

### XUBINTA 1AAD
### HORUMARINTA

### Qodobka 26aad
### Helida iyo Qiimaynta

(1) Haddii shidaal la helo ka dib marka la qaado tijaabooyin sida: muunad ciideed ama qodid dhulka hoostiisa lana muujiyo shidaal qulqule ah, qandaraasluhu waa in uu Wasiirka ku wargeliyaa muddo 48 saacadood gudahood ah ka dib maalinta la helay. Waana inuu sidoo kale Wasiirka siiyaa sharaxaad khaas ah oo qoraal ah oo la xidhiidha helidda sida ugu dhakhsaha badan si markaa loo darso in shidaalka la helay uu istaahillo in lagu sameeyo kayd qiimayn dheeraad ah iyo in kale.

(2) Qandaraasluhu, waa inuu marka uu muujiyo in heliddu u qalanto qiimayn, diyaariyaa una gudbiyaa Wasiirka qorshe iyo jedwal uu ku fulinayo qiimayn ku filan heliddaas iyado lagu ogolaanayo go'aan dhakhso ah in la qaato sida ugu suurto galsan ah bal in heliddaasi u qalanto qorshaha horumarinta goobta iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka iyada oo la cayimayo mudadda la fulinayo qiimayntaas.

(3) Marka hal ama wax ka badan oo kaydka shidaalka ah la ogaado inuu ku habboonyahay in lasoo gudbiyo qorshaha horumarinta goobta. Qandaraasluhu waa in uu diyaariyaa keydka horumarinta shidaalka si waafqsan xeerkan iyo xeer-nidamiyaasha iyo si waafaqsan dhaqanka wanaagsan ee ka jira wershadaha shidaalka.

**Qodobka 27aad**
**Qorshaha Horumarinta Goobta**

(1) Hawl-wadeenku isaga oo ka wakiila qandaraaslayaasha waa in uu u gudbiyaa Wasiirka dib u eegid ku saabsan qorshaha horumarinta goobta ee la xidhiidha mid ama wax ka badan oo kaydka shidaalka ah in la horumariyo si waafaqsan shuruudaha xeerkan, heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka iyo xeerarka dhaqan-galka ah iyo xeer-nidaamiyayaasha. Hawl wadeenku isagoo ka wakiil ah qandaraaslayaasha waa inuu ku muujiyaa qorshaha horumarinta goobta una gudbiyaa Wasiirka in xalalkaas lasoo gudbiyey looga gol leeyahay in lagu gaadho qadar soo kabasho wanaagsan ee mudadda nolosha kaydka shidaalka.

(2) Wasiirada kale ee ka masuulka ah qaybaha muhiimka ah ee saamaynaya qorshaha horumarinta goobta waa inay helaan qorshaha horumarinta goobta si ay dib ugu eegaan, waana in loo ogolaadaa ugu yaraan 30 maalmood oo ogeysiin ah si ay faalo u soo gudbiyaan.

(3) Wasiirku wuxuu u baahan karaa wax-ka-beddel ama dhamaystir inuu ku sameeyo dib-u-eegista qorshaha horumarinta goobta.

(4) Wasiirku waxa uu dalban karaa baaxad dheeraad ah in lagu daro agabyada qorshaysan si ay mustaqbalka u suurtageliso isticmaalka dhinac saddexaad. Magdhawga baaxadaas dheeraadka ah waxay ku xadiddan tahay dhinaca saddexaad inuu helo dakhliga sida uu xeerinayo xeerkan iyo xeer-nidaamiyaasha, waddankuna ma bixinayo magdhaw gaar ah.

(5) Ma bannaana waajibaadyo dheeraad ah oo heshiis ah in la fuliyo, hawl dhismena lama bilaabi karo ilaa qorshaha horumarinta goobta la ansixiyo.

(6) Ansixinta qorsahaha oogadda dhulka ee uu sameeyey Wasiirku ee ku saabsan horumarinta goobta dhulka ee kharash-keedu ka badanyahay 50 Millyan ee Doolarka Maraykanka ah, waana inay ansixiyaan Golaha Wasiiraddu una gudbiyaan Golaha Wakiilada.

## Qodobka 28aad
## Nuxurka Qorshaha Horumarinta Goobta

**(1)** Qorshaha horumarinta goobtu waxa uu ka kooban yahay laba qaybood oo qaybi ay ku saabsan tahay qiimaynta raadka deegaanka, qaybta labaadna ay ku saabsan tahay habka horumarinta khayraadka kaydka shidaalka iyo sidoo kale arrimaha dhaqaale ee la socda hawsha iyo farsamda ku jirta xalka horumarinta.

**(2)** Hababka, shuruudaha iyo xaaladaha la xidhiidha qorshaha horumarinta dhulka oo ay ku jiraan cilmi-baadhista qiimaynta raadka deegaanka ay ku yeelan karto waxaa xeerin doona xeer-nidaamiye. Horukaca qorshaha horumarinta dhulka waxaa loo fulinayaa qaab nidaamaysan lagalana xaajoonayo Wasiirka, waxaana la tixgalinaya Lana rogrogayaa fikrado badan oo ku saabsan arinka sida uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu. Waa in lagala tashadaa dadweynaha sida uu dhigayo xeer-nidaamiyuhu.

**(3)** Hawl-wadeenadu iyagoo ka wakiil ah qandaraaslayaasha waa in ay ku wargeliyaan Wasiirka isbedel kasta oo muhiim ah ama wax-ka-beddel ku yimaada qorshaha horumarinta dhulka ee uu ansixiyey Wasiirku iyo wax-ka- beddel kasta oo ku yimaada qaab hawleedka.

## XUBINTA 2AAD
## SOO SAARISTA

### Qodobka 29aad
### Tijaabada Soo Saarista

Qandaraasle waa in aanu ka qayb qaadan ama aanu fulin tijaabada soo saarista isaga oo aan ogolaasho ka helin Wasiirka, si waafaqsan qodobbada uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu. Tijaabada soo saarista waxaa keliya oo la fulinayaa muddo xadiddan oo lagama maar-maan ah taas oo ka turjumaysa in lagu aasaaso laguna hubiyo macluumaadka looga baahan yahay in la diyaariyo hirgelinta horumar heer buuxa leh iyo soo saarista oo ay la socoto ansixinta qorshaha horumarintu

### Qodobka 30aad
### Sahaminta Dhuumaha Shidaalka ee Berriga

Qandaraaslaha ama rukhsadlaha leh ama masuul u xilsaaran dhigidda dhuumaha ama xadhkaha ee ku guda jira goobta heshiiska, rukhsadda waa in xilli ku filan ka hor bilaabida sahaminta marinka dhuumaha ama xadhkaha uu u gudbiyaa xogta wasiirka iyo hay'adaha takhasuska u leh ka hawl-galka dhuumaha iyo xadhkaha shidaalka, waana in la helaa ogolaanshaha mulkiilaha/yaasha dhulka haddii aan Waddanku dhulka lahayn.

### Qodobka 31aad
### Ogolaanshaha Wax-Soo-Saarista

**(1)** Marka codisgu ka yimaado qandaraaslaha, Wasiirku waa inuu bixiyaa ogolaanshaha muddo cayiman si loo soo saaro xadigga shidaalka ee laheli karo. Wasiirku

waa in uu cayimaa habka iyo xaqiijinta kaydka qoraalada (Document) looga baahan yahay codsiga iyo bixinta ogolaanshaha soo saarista uu ogolaaday xeer-nidaamiye.

**(2)** Qandaraasluhu waa inuu fuliyaa qiimeyn joogto ah oo uu ku samaynayo istraatijiyada wax-soo-saarka iyo tiknoolajiyada, waana inu qaadaa tallaaboyinka kor loogu qaadayo ee ku saabsan wax ku oolnimada soo saarista.

**(3)** Wasiirku wuxuu amri karaa qandaraaslaha inuu qaado talaabooyinka lagama maarmaanka ah iyo talaabooyinka macquulka ah ee kor loogu qaadayo ama lagu yaraynayo heerka shidaalka lagu soo saarayo iyo heerka kor loogu qaadyo soo saarista ugu danbaysa ee shidaalka laga soo saaryo goobta, iyada oo aan la dhaafinayn baaxada jirtey ee adeegyada soo saarista si waafaqsan xeer- nidaamiyaasha.

**(4)** Wasiirku wuxuu ka dalban karaa qandaraaslaha, inuu u soo gudbiyo warbixin ku saabsan adeegyada la xidhiidha soo saarista shidaalka, oo ay ku jiraan qorshayaal la kala dooran karo oo ku saabsan soo saarista iyo kor u qaadidda ama farsamooyin casriya korna u qaadaya kaas oo kabadasha hawsha.

## Qodobka 32aad
## Cabiraada Shidaalka

Wasiirka ayaa ku soo saaraya xeer-nidaamiye, qalabka, hababka, heerarka iyo heerka cabirraada ee la adeegsanyo cabirka soo saarista shidaalka, sifaynta/habaynta ama dhoofinta ku saabsan maamulka

khayraadka, hawl-galka farsameed, dhaqaalaha iyo ujeeddooyinka lacageed oo ay ku jiraan dhammaan waxyaabaha uu liis gareeyey hantidhowrku.

## Qodobka 33aad
## Midaynta

**(1)** Haddii kaydka shidaalku ku fido meel ka baxsan khadka xadaysan ee heshiiska goobta una fido goob kale, dhammaan qandaraaslayaashu waa inay raadiyaan inay gaadhaan heshiis sida ugu wanaagsan ee la isugu duwi karo hawlaha shidaalka si loo xaqiijiyo ka soo kabashada shidaalka ee ugu sarraysa oo ay ku jiraan qayb kasta oo ka mid ah xuquuqda qandaraaslaha ee shidaalka, isla markaana waa in israacsanaanta heshiisyada loo gudbiyaa Wasiirka si uu u ansixiyo.

**(2)** Haddii ay si wada jira qandaraaslayaashu u galeen heshiis isku mida ah si waafaqsan faqradda (1aad) lakiin, ay ku guuldaraysteen is afgarad dhexdooda muddo macquul ah, Wasiirku wuxuu soo rogi karaa shuruudo iyo xaalado heshiiska qaybinta oo ay ku jiraan kala qaybinta lagama maarmaanka ah iyo mabaadii'da dib u qaybinta xuquuqaha qandaraaslayaasha ee ku wajahan shidaalka.

**(3)** Haddii heshiiska kaydka shidaalku uu dhaafo goobta heshiiska uuna galo goob aan ku jirin heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka, qandaraasluhu wuxuu codsi u soo gudbinayaa Wasiirka si uu u fidiyo heshiiska goobta si waafaqsan qodobbada uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu. Wasiirku

wuxuu qeexi karaa shuruudo daba socda codsiga, kuna dari karaa goobo dheeraad ah, sida waaafaqsan faqradan.

Haddii kaydka shidaalku uu dhaafo xuduudda caalamiga ah ee dawladda, keydka shidaalka waxa lagu dabaqayaa qodobbada caalamiga ah ee israacsanaanta ee ku dhigan mucaahado ay galeen dawladda iyo wadamada ama wadanka jaarka ah. Marka laga reebo sababo bedqab awgood. Hawl shidaal lagama samayn karo, keyd shidaal oo xuduuddaha labada dal iskaga gudba ka hor inta aan la gelin mucaahado ka dhaxaysa waddamada ay khusayso.

**(4)** Haddii heshiis si waafaqsan (4aad) uu hirgalo, ogolaanayo qiimayn iyo kormeer ay samaynayaan shaqaalaha dawlad kale, qaranku wuxuu siin karaa xasaanad shaqaalaha dawlada ee ajinebi ee arimaha la xidhiidha shaqadooda si ay u fuliyaan si waafaqsan qodobada heshiiska.

## Qodobka 34aad
## Hawlo shidaal oo si wada jira loo fulinayo

**(1)** Qandaraaslayaasha ka kooban laba ama wax ka badan oo leh goobo isku xiga oo laga helay kayd shidaal, waxay ku heshiin karaan in hawlaha shidaalka si wada jir ah ay u fuliyaan.

**(2)** Hawlo shidaal oo wada socda si waafaqsan faqradda (1) waa inay qandaraaslayaashu sameeyaan hawl wadaaga si faa'iido weyn loo wada gaadho gaar ahaan kor u qaadidda helidda shidaalka ama yaraynta kharashka ku baxaya.

(3) Heshiisyo ku saabsan qodaal sahamineed oo si wada jir ah ku gaadheen qandaraaslayaashu, waa inay u gudbiyaan Wasiirka. Heshiisyada kale ee ku saabsan hawlaha shidaalka wadaagga waxaa loo gudbinayaa Wasiirka si uu u ansixiyo.

(4) Haddii aanay qandaraaslayaashu ku guuldaraysantaan in ay ku heshiiyaan shuruudaha ku saabsan hawl shidaal oo la wada qabanayo si waafaqsan faqradda (2) muddo macquul ah gudaheed, shuruudaha iyo xaaladaha waxaa qeexi doona Wasiirka.

**Qodobka 35aad**
**Isticimaalka Gaaska Dabiiciga ah iyo Xadidaadda sii deynteeda iyo Holcinta**

(1) Gaaska dabiiciga ah ee ku lammaan saliidda waxaa keliya oo loo isiticimaali karaa hawlaha shidaalka si waafaqsan hab-raaca iyo xeer-nidaamiyayaasha ugu wanaagsan ee la heli karo ee la qoondeeyo.

(2) Qandaraaslayaasha ama ruqsadlayaashu waa in ay ka helaan ogolaansho wasiirka, ka hor in taan la samayn holcin ama ku siidayn gaasta hawada lagu sii daayo iyada oo qabow. Holcinta ama hawada ku siidaynta gaasta iyada oo qabow iyo waxyaalaha la socda waxaa keliya la ogolaan karaa, marka ay lagama maarmaan u tahay bad-baadadda oo ay ku jirto xaaladaha degdegga ah, oo aan wakhtigu ogolaanayn in ogolaansho la helo ama marka agab hawleed la dhisayo.

## Qodobka 36aad
## Ruqsadaha Agabka

(1) Wasiirku wuxuu shuruudo cayiman ku siin karaa codsi cayiman rukhsad ku saabsan dhisme, meelayn iyo hawl-gal gaadiid/safar ama hawlo kaydin marka aanay xuquuqahaasi mar hore ku jirin qorshaha horumarinta goobta.

(2) Rukhsadda agabka waxaa la bixin karaa xilliga uu cayimo Wasiirku. Codsiga waa in uu ku jiraa raadka qiimaynta deegaanka iyo iyada oo loo hoggaasamayo shuruudaha kale, hababka codsiga, shuruud bixinta iyo waxyaabaha ku jira shuruudaha waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

## Qodobka 37aad
## Xaqa Helidda Dhinaca Saddexaad

Wasiirka ayaa go’aan ka gaadhi doona isaga oo ku salaynaya shuruudaha ku dhigan xeer-nidaamiyayaasha in dhinaca saddexaad uu leyahay xaqa isticimaalka awood dheeraad ah, oo ku saabsan adeega soo saarista, safrida ama kaydka shidaalka. Hab-raacyada iyo mabaadii’da cashuurta waxaa qeexi doona xeer-nidaamiyayaal

## Qodobka 38aad
## Adeegsiga saldhiga, degida iyo goobaha laga dhoofinayo shidaalka

(1) Wasiirku wuxuu qeexi karaa marka shidaalka laga helay lakabka hoose, in la dhigo meel maraakiibta shidaalku ay ka dhoofin karaan, haka yimaado berriga ama lakabka hoose midkood.

**(2)** Hawlaha shidaalka oo ku saabsan lakabka hoose ee dhulka waa in laga fuliyaa saldhigga Somaliland sida hadba uu u tilmaamo Wasiirku.

## Qodobka 39aad
## Tamar bixinta Xaalad degdeg ah

Haddii ay jirto xaalad dagaal ama xaalad kale oo deg-deg ah oo saamaynaysa bixinta tamarta. Wasiirku wuxuu ka dalban karaa qandaraaslaha in uu ka iibiyo dhammaan ama qayb ahaan tirada shidaalka ee la soo saaray wadanka ama hay'ad dawladeed iyadoo laga siinayo qiimaha suuqa ee wakhtigaa.

## XUBINTA 3AAD
## XIDHIDA GOOBTA HAWLGALKA

## Qodobka 40aad
## Joojinta Hawlgalada

**(1)** Si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha, qandaraaslaha ama ruqsadluhu waa in uu wakhti hore sii wargeliyaan Wasiirka sida ugu dhakhsaha badan ka hor dhammaadka hawlaha shidaalka ama isiticimaalka adeegga.

**(2)** Ka dib dhamaadka hawalaha shidaalka ee goob kasta oo waafaqsan xeerka, qandaraaslaha ama ruqsadluhu waa inay dib u hagaajiyaan goobaha shidaalka ee la sameeyey kana saaraan dhamaan wixii khasaare ku sababi kara ama khatar ku keeni kara deegaanka iyaga oo raacaya sida ay dhigayaan xeerarka u yaala. dib usoo noolayntaas goobta waa ina laga hawlgalaa gaar ahaan ka saarista dhammaan hantida la keenay goobta ee la isticmaalay laakiin aan sidaas loogu sii

baahnayn. Dib-usoo noolaynta goobta, hawlaha dheeraadka ah ee shidaalka la xidhidha, qufulidda dhammaan ceelasha laga haajiray/tegay, xafidaadda iyo ilaalinta khayraadka dabiiciga ah ee goobahaas sida uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu.

## Qodobka 41aad
## Qorshaha Xidhitaanka goobta

(1) Qorsaha xidhitaanka/soo afjaridda waa in si waafaqsan xeer-nidaamiyaha loogu soo gubiyey Wasiirka ugu horeyn seddexda sannadood inta aan go’aanka xidhitaanku dhicin kana dambayn hal sanno dhicitaanka rukhsaddooda ama ka noqoshada la qorsheeyay ee heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ama furasada agab si waafaqsan xeerkan ama dhammaadka isticimaalka adeegyada ee aaladaha qalabka. Haddii arin deg-deg ahi timaado sida kacdoon, xaalada ka noqoshada ee heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama ruqsada agab qorshaha xidhitaanka goobta waa in la diyaariyaa loona gudbiyaa sida ugu dhakhsaha badan.

(2) Dhamaystirka/ soo afjarida goobta hawshu ka socotay, Wasiirku ayaa leh go’aanka ku saabsan hirgelinta qorshaha dhamaystirka. Go’aanku wasiirku wuxuu wax-ka-bbedeli karaa qorshaha la gudbiyey ama wuxuu dalban karaa wax-ka-bbedel qorshaha loo gudbiyey.

(3) Qandaraaslaha ama ruqsadlaha iyo dadka kale ee masuulka ah waa inay hirgeliyaan go’aanka

dhamaystirka sida waafaqsan faqrada (2) si habsan la'aan ah. Qof kasta oo ka masuul ah hirgelinta go'aanka xidhitaanka waxaa uu masuul ka noqonayaa khasaaraha uu gaadhsiiyey dhinac saddexaad si waafaqsan qodobbada xeerkan.

**Qodobka 42aad**
**Lacagta dhamaystirka goobta**

Si loogu helo lacag hawl-galada dhamaystirka goobta hawshu ka socotay ee ku jirto ansixinta qorshaha ka saarista ee qandaraaslaha ama rukhsadlaha, waa in ay aas aasaan lacag ka saarista/dhamaystirka loogu talagalay goobta shidaalka si wafaqsan xeer-nidaamiyaha uu soo saaray Wasiirku.

**Qodobka 43aad**
**Dib u qaadasho**

**(1)** Dawladdu iyada oo aan wax magdhaw ah ka bixin ayay la wareegaysaa lahaanshaha ama xaqa isticmaalka agabka marka heshiiska sahaminta iyo wadaagista ama ruqsada agabku si waafaqsan xeerkan ay u dhacdo ama dib loo soo celiyo (lala noqdo) ama agabka isticmaalku uu dhammaado. Marka dawladdu la wareegayso agabka waa in uu ku jiraa xaalad wanaagsan oo shaqaynaysa.

**(2)** Haddii agabka la dhigo dhul si gaar ah loo leeyahay, dawladdu waa in ay uga magdhawdaa mulkiilaha dhulka isiticmaalka dhulka ee ka baxsan mudadda intii hore ruqsadluhu ama qandaraasluhu u bixiyey. Si waafaqsan Dastuurka iyo qodobka 60aad ee xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.

(3) Marka ay la wareegto dawladdu agabka. Lacagta loogu talagalay in lagu daboolo kharashka joogtada ah ee dhammaadka hawla shidaalka ama ka saarida waa in ay noqotaa hanti dawladdu leedahay marka lacagtaasi ay u ururto isla markaana uu ku rido sanduuq gaarka ah, qandaraasluhu ama rukhsadluhu isaga oo ka keenaya dakhliga si waafaqsan kharashka dib u soo kabashada heshiiska sahaminta iyo wadaagidda waxa-soo-saarka, rukhsadda ama cashuuraha lagu dhaqan-geliyey sida xeerarka khuseeyaa dhigayaan.

(4) Haddii isticmaalka dhulku uu kiraysnaa, dawladdu waxay xaq u leedahay in ay ku sii wado kiradaas isla shuruudihii dhaqan-galka ahaa ka hor dhicitaanka, dib usoo celinta rukhsada ama la soo noqoshada heshiiska wax-soo-saarka iyo qaybsiga faa'iidada dhammaadka isticmaalka agabka.

(5) Haddii dawladdu doonto in ay la wareegto agabka lala damacsanyahay in laxawilo/dhoofiyo, qandaraaslaha ama rukhsad haystuhu waa inuu ku wareejiyaa dhammaan xuquuqaha iyo diwaanada la xidhiidha agabkaa iyo hawl galada lagama maarmaanka u ah sii wadidda hawalaha shidaalka si waafaqsan shuruudaha lagu sheegay xeer nidamaayaha dawladda

(6) Xuquuqaha isticmaalka ee dhinaca seddexaad ee la xidhiidha agabka uu ansixiyo wasiirku waxay sii ahaanayaan dhaqan gal hadii dawladda la wareegto agabka.

# QAYBTA 4AAD
# XUQUUQAHA, CASHUURAHA, CAAFIMAADKA, BAD-QABKA IYO DEEGAANKA

## XUBINTA 1AAD
## AJUURADDA IYO ABAALMARINTA GOOBTA

### Qodobka 44aad
### Kirada goobta Sahanka

1. Qandaraasluhu waa in uu waddanka siiyaa ajuuro kiro goobeed oo goobta ay heshiiska u haystaan ah, taas oo bilaamanaysa taariikhda uu heshiiska sahaminta iyo wax-soo-saar wadaaggu dhaqan-galo, intaa wixii ka dambeeyana si sannadle ah.
2. Kirada goobta sahanku waa in ay noqotaa mid kobocda oo loo xisaabiyo kiloomitir laba-jibaaran oo ku salaysan hababka iyo dariiqooyinka lagu sheegay xeer-nidaamiyayaasha ama heshiiska wadaagista sahaminta iyo wax-soo- saarka, waana in ay kala duwanaan karaan goobaha badda iyo berriga. Goobaha heshiiska isaga oo u hogaansamaya hawlaha socda ee shidaalka iyo haddii caqabado ka horyimaadan ka baxsan xakamaynta qandaraasluhu xeerka guud wuxuu noqonayaa in aan waajib loogu yeelan kirada goobta sahanka ee ay xeer-nidaamiyayaal qeexitaan dheeraad ah ka bixiyeen.

### Qodobka 45aad
### Ajuurooyinka iyo Abaalmarinnada

(1) Dawladdu waxay ku soo saari kartaa xeernidaamiyeyaal ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka in ajuurooyinka la bixinayo ee la' xidhiidha soo saaris kasta oo shidaal

oo xuduudda dawladda gudihiisa iyo badda hoosteeda.

**(2)** Dawladdu waxay xaq u leedahay inay ka ururiso xuquuqaha ajuuradda, ha ahaato naqad/kaash ama alaab ahaan, saami ahaan sida soo saarista ka timi kaydka shidaalka oo u hogaansamaysa qorshaha horumarinta ee la'ansixiyey iyo ogolaanshaha wax-soo-saarka, marka laga reebo shidaalka dib loo geliyey kaydka shidaalka ee ku guda jira goobta heshiiska.

**(3)** Shidaalka laga soo saaray ee waafaqsan heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-dsaarka waxaa uu u hogaansamayaa lacag bixinta ajuuradda ee caddadka iyo heerka hababka lacag bixinta hadba sida uu u cayimo xeer-nidaamiyuhu, qandaraasluhuna waxa uu masuul ka yahay lacag bixinta ajuurada sida waajibtay ee la xidhiidha shidaalkaas.

**(4)** Ajuurooyinka loo qoondeyey Dawladda waa in aaney daba socon lacag bixin, alaab ahaana waa in loogu keenaa Dawladda kharash la'aan, marka loo keenayo si waafaqsan qorshaha horumarinta.

**(5)** Dawladdu waxay ku qeexi kartaa xeer-nidaamiye ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ee lagu talagay ajuuradda lacag bixinta ku cayiman ujeedadda/yoolka.

**Qodobka 46aad**
**Saamiga qaybsiga**

Habka xisaabinta iyo qoondeynta wadaagista soo saarista oo ay ka mid tahay qarashka shidaalka iyo faa'iidada shidaalka waa in uu wasiirku ku sheegaa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka si waafaqasan xeer-nidaamiyayaasha ay u ansixiyeen golaha wasiiradu.

**Qodobka 47aad**
**Qiimaha Shidaalka**

**(1)** Qiimaha shidaalka waxaa uu waafaqsannaan doonaa hababka lagu qeexay xeer-nidaamiyayasha waxaana uu ku salaysnaan doonaa qiimaha shidaalka ee laga soo xigtay dhex-dhexaadiyaal saddexaad oo ku xeel-dheer qiimaha suuqa caalamiga ah ee la mid ah tayada shidaalka.

**(2)** Iib kasta ama caddadka shidaalka la gaadhsiiyey waa in lala socod siiyaa Wasiirka.

**Qodobka 48aad**
**Qiimaha Suuqa**

Iyada oo loo hogaansamayo qodobadda xeerkan, waxaa tixgelin mudan hawl kasta oo u dhaxaysa qandaraasle ama ruqsadlaha iyo cid xidhiidh la leh si la' xidhiidha hawlaha shidaalka ee loo fulinayo sida ku cad xeerkan iyada oo lagu salaynayo qiimaha tartanka caalmiga ah ee jira iyo shuruudaha kale ee cadaaladda noqonaya isla markaasna macquul ah hadii hawshaasi ay ka dhex dhacday qandaraasle ama ruqsadle iyo cid aan xidhiidh la lahayn ahayn.

## XUBINTA 2AAD
## CASHUURAHA

### Qodobka 49aad
### Cashuurta iyo Dhaafida

Qandaraaslaha iyo rukhsadalayaasha fulinaya hawlaha shidaalka ee xuduudda qaranka gudihiisa iyo badda hoosteeda waxa u hogaansamayaan cashuuraha iyo ka dhaafidda cashuurta sida ku qeexan xeerka dhaqan-galka ah, wasiirku wuxuu xeerinaya heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka isla markaana ilaalin doonaa isbeddel wayn oo lagu sameeyo cashuuraha iyo ka dhaafista, si aanay u saamayn heshiiska.

### Qodobka 50aad
### Lacag Bixinta

Lacag bixinta dhammaan ajuuradda, abaalmarinta iyo lacag bixinnada la siinayo dawladda ee la'xidhiidha hawlaha shidaalka ee waafaqsan xeerkan iyo heshiiska soo saarista waxay waafaqsannaan doontaa xeerka dakhliga shidaalka.

### Qodobka 51aad
### Rahanka iyo Diiwaangelinta Xuquuqaha

**(1)** Qandaraasle wuxuu rahmi karaa danta ka qaybqaadashadiisa oo keliya ee heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ama rukhsada agabka ee ku saabsan in lagu maal-geliyo hawlaha shidaalka ee la xidhiidha heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ama rukhsada agabka ka dib, marka uu Wasiirku ansixiyo si waafqsan xeer-nidaaamiyaha

uu cayimo Wasiirku. Adeegyada muhiimka ah iyo qalabka uu leeyahay adeegga muhiimka ah waa in aan loo rahmin si gaar ah.

**(2)** Rahmidda lagaga qayb qaadanayo danaynta heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ama agabka ruqsada ee ka kooban xuquuqaha waxaa loo raaci kara heshiiska gaar ah ama ruqsada.

### Qodobka 52aad
### Diiwangelinta Rukhsadaha iyo Heshiiska Sahaminta iyo Wadaagista Wax-soo-saarka

**(1)** Diiwaanka rukhsadaha iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka waa in lagu hagaa si waafaqsan xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

**(2)** Deynta wax loo rahmay loona diiwangeliyay si waafaqsan faqradda (1aad) waxay ka mudan tahay daymaha kale laga bilaabo taariikhda rahanka laga diwaan galiyay diwaanka shidaalka, marka laga reebo daymaha la doorbiday ee lagu sugay xeerka khuseeya.

**(3)** Diiwaanka rukhsada iyo heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka waa in lagu xidhaa diiwaanka dhulka hannaan/waddanka ka jira oo waafaqsan xeerkan.

## XUBINTA 3AAD
## CAAFIMAADKA, BAD QABKA IYO DEEGAANKA

### Qodobka 53aad
### Awoodda Caafimaadka, bad qabka iyo Deegaanka

**(1)** Ka hor inta aanu qandaraasluhu ama ruqsadluhu fulinin hawl kasta oo shidaal waa inuu dhowraa qorshaha amni sida uu xeerinayo xeer-nidaamiyuhu isla markaasna xafidaa goobta shaqo sida uu awooda u leeyahay inuu si wax-tarleh u la dhaqmo dabka, daadashada saliidda, wasakhawga-, shilalka ama xaaladaha deg-dega ah si looga hortago ama loo maamulo xaaladaas lagu yaraynayo lumista iyo khasaaraha ku yimaada.

**(2)** Qof kasta oo maaraynaya ama wada hawl shidaal si waafaqsan ama ka dhalanaysa heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka ama rukhasad loo bixiyay si waafaqsan xeerkan, waa in la ilaaliya heerka caafimaad iyo badqabka sare ee shaqaalihiisa iyo qandaraaslayda hoos yimaada.

**(3)** Ruqsadle iyo ka qayb-qaate kale oo hawlo shidaal waa inay noqdaan kuwo leh takhasus ay shaqada ugu qabtaan si taxadar leh.

**(4)** Hawlaha shidaalka waxaa loo samayn doonaa qaab suurtagelinaya in la joogteeyo heer ba-baado oo sareeya, isla markaana loo sii horumariyo si waafaqsan horumarka tignoolajiyada, hannaanka ugu wanaagsan ee urur-weynaha shidaalka, Xeerarka caafimaadka iyo xeerarka kale ee khuseeya.

## Qodobka 54aad
## Aagaga Badqabka

**(1)** Dhammaan goobaha Dhulka iyo baddaba ee ay ka socoto sahaminta iyo soo saarista shidaalka waa inay noqdaan aag ka bed qaba in lagu shubo wasakh

noockasta oo ay ahaatoba, wasakhdaas oo wax yeelaysa degaanka berriga iyo baddaba iyo noolaha ku noolba

**(2)** Ciddii bed qabka aagga sahaminta iyo soo saarista shidaalka wax yeelo wasakhayn ah u gaysata waxa la horgaynayaa hay'adaha nabad-gelyadda si ay ugu gudbiyaan maxkamadda awooda u leh.

**(3)** Wasiirku wuxuu go'aamin karaa in goob bed qab ah la aas aaso wakhti macquul ah ka hor intaan la dhigin alaabta ku xusan farqadda 1aad.

**(4)** Wasiirku wuxuu go'aamin karaa haddii ay jirto meel hore loo isticmaali jiray bedqab (goob amaan) agab laga tegay ama la aasay la isticmaali karo.

**(5)** Doonyaha, maraakiibta iyo agabka kale ee aan haysan ogolaanshiiyaha waa inaan la dhigin goobaha lagu soo sheegay farqadaha (1aad), (2aad),(3aad), iyo (4aad). Wasiirku wuxuu ogolaan karaa kaluumaysiga in uu ka dhaco aagga ama qaybaha ku dhow goobta hawsha laga wado, iyadoon waxba yeelayn bed-qabka ama faragelinayn hawlaha shidaalka.

**(6)** Wasiirku wuxuu ku cayimi karaa xeer-nidaamiye si uu u sugo amaanka goobta iyo alaabada ku xusan qaybta (1aad) ee goobaha sida ku cad farqadda (3aad).

**(7)** Qodobkan looma adeegsanayo agabyada berriga ama xeebaha iyada oo la ilaalinayo xuquuqaha gaarka ah ee hantida khaaska ah.

## Qodobka 55aad
## U diyaargarawga Xaaladaha Deg-dega ah

**(1)** Ka hor inta aan la bilaabin hawlaha shidaalka ruqsadlaha ama qandaraasluhu waa inay sameeyaan qorshayaal loogu diyaargaroobayo xaaladaha degdega ah si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha uu waasiirku soo saaro.

**(2)** Rukhsadlaha ama qandaraasluhu waa inuu bilaabaa wadaana tallaabooyin amni oo wax ka taraaya in laga fogaado weeraro ka dhan ah agabka waana inuu lahadaa mar walba qorshayaal ku saabsan xaaladaha degdega ah oo wax lagaga qabanayo weeraradaas.

**(3)** (Ruqsadluhu ama qandaraasluhu waa inuu agabka u ogolaada masuuliyiinta khusayso tijaabooyinka tababarada xaaladaha degdega ah iyo amniga, waana in marka ay daruuri tahay ka qayb qaataan tijaabooyinkaas tababar.

**(4)** Ciidan hubaysan waxa waddanku keeni karaa oo keliya markuu codsado hawl-fuliyaha ama ruqsadlaha iyo qandaraaslaha.

**(5)** Ruqsadle ama ka qaybqaate kale oo hawlo shidaal waa inuu xili kasta ku sugnadaa diyaar ahaansho munaasab ah oo xaalad degdeg ah, kaas oo ujeedkiisu yahay la tacaalidda shilalka iyo xaaladda degdega ah ee keeni kara dhimasho ama dhaawac shakhsi, wasakhayn ama waxyeelo weyn oo hantiyeed.

**(6)** Ruqsadluhu waa inuu hubiyaa in la sameeyo tallaabooyinka loo baahan yahay in lagaga hortago

ama lagu yareeyo saamaynaha waxyeelada leh, tallaabooyinkaa oo ay ka mid yihiin kuwo loogu baahan yahay in sidii suurtagal ah loogu soo celiyo deegaanka xaaladdii uu ku sugnaa ka hor intii aanu shilku dhicin.

**Qodobka 56aad**
**Hakin waddanku sameeyo**

Mar kasta oo ay dhacdo in ruqsadle uu ku guuldaraysto inuu u fuliyo hawlo shidaal si amaan ah oo waafaqsan sharciga khuseeya iyo farsamooyinka caalamiga ah ee jira iyo hababka bah-weynta shidaalka ee xaaladdo la garab dhigi karo, wasiirku, ka dib marka uu rukhsadlaha ama qandaraaslaha kii ay noqotoba siiyo ogaysiis macquul ku ah wacyiga, wasiirku wuxuu qaadi karaa dhammaan tallaabooyinka daruuriga ah si uu u hubiyo badbaadada. Tallaabooyinkaas oo ay ku jiraan hakinta hawlaha shidaalka illaa inta loo baahan yahay ee ay ogalaanayaan hawlaha shidaalka, waxaana kharashka ku baxa laga qaadayaa rukhsadlaha ama qandaraaslaha**.**

## QAYBTA 5AAD
## QODOBADA KALA DUWAN

**Qodobka 57aad**
**Shaqada**

Heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ama rukhsada agab ee loo bixiyay si sharcigan waafaqsan, si dadban iyo si toosa toona uma bixin karto gacan ku hayn buuxda qof dan ka qayb gal ku leh heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ama ruqsada agabka, uu ku wareejiyo, gebi ahaan ama qayb ahaan

qandaraaslaha ama ruqsadluhu qof kale iyada oo aan ogolaansho qoraal ah laga helin wasiirka.

## Qodobka 58aad
## Xuquuqaha Dhulka

(1) Iyada oo loo hogaansamayo qodobada xeerkan iyo xeer-nidaamiye sida uu xeerinayo, dawladu, qandaraaslaha ama ruqsadluhu xaq buu u leeyahay inuu galo dhul kasta oo aan ahayn xarumo ciidan si u fuliyo hawlo shidaal.

(2) Qof kasta oo haysta lahaansho ama dan ku leh, dhul kaas oo Dawladda, qandaraaslaha ama ruqsadluhu u soo jeediyo inuu galo kana fuliyo hawlo shidaal waa inuu ogolaadaa hawlahaas iyada oo shardi tahay:

- **b.** Inta aan la bilaabin hawlahaas, dhammaan dadka leh shaqada ama danta ka leh dhulka hawshaas laga fulinayo, waa in la ogeysiiyaa ujeedada, nooca iyo goobta hawsha laga fulinayo;
- **t.** qof kasta oo leh lahaanshaha ama dan ka leh Dhulkasta oo rukhsad u haysto ay soo gaadho khasaare ama waxyeelo oo najiitadeedu tahay hawl shidaal, wuxuu xaq u leeyahay magdhawga sida ay xeerarka khuseeya dhigayaan
- **j.** Magdhawga waa in loo xisaabiyaa qiimaha ka hor intaan la bilaalbin hawlaha shidaalka ee dhulka arintu ku saabsan tahay.

## Qodobka 59aad
## Hawlaha wax-ku-oolka ah ee Shidaalka

Hawlaha shidaalka waa in loo fuliyaa si xilkasnimo ah oo waxtar leh oo waafaqsan xeerka dhaqan-galka ah iyo caadooyinka wanaagsan ee caalamiga ah ee ka jira

shaqada shidaalka, iyada oo lala imanayo farsamo yaqaannimo wanaagsan iyo dhaqamo teknoloojiyadeed Lana isticmaalayo teknoolajiyad hore-u- marsan oo ku haboon iyo qalab wax-ku-ool ah, mishiino, habab iyo alaabooyin tayo leh.

## Qodobka 60aad
## Xogta, macluumaadka iyo Warbixiin muunadda iyo Maaraynta

**(1)** Rukhasadlayaasha iyo qandaraaslayaasha iyo hay'daha kale ama dadka fulinaya hawsha shidaalka waa inay ilaaliyaan xafidaana dhammaan tixraacyada saxda ah ee Somaliand gudaheeda, ee ah dhammaan hawlaha shidaalka la fuliyey, sida dhammaan raad-raaca macluumadka khuseeya shidaalka, alaabada (qalabka), macluumaadka iyo habka muunada la helay isla markaasna xafidaan buugag maaliyadeedka oo dhan oo sax ah raad-raaceeda, diiwan galin la xidhiidha Hawl-galka. Haddii rukhsada ama heshiiska wax-soo- saarku dib loo soo celiyo hawl-wadeenku waxuu masuul ka yahay inuu ilaaliyo isla markaan hayo macluumaadka la xidhiidha rukhsada uu soo celiyay ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka.

**(2)** Qandaraaslaha iyo rukhsadluhu waa inay siiyaan wasiirka warbixino joogto ah oo muddaysan oo ku saabsan hawlaha ay fulinayaan waana inay siiyaan tixraaca noocyada iyo macluumaadka warbixinada sida hadba Wasiirku ugu baahdo ama uu u xeerinayo xeernidaamiyuhu.

(3) Alaabooyinka loo baahaan yahay, oo ay ku jiraan xogta Eleg-trooniga ah) (soft wars), si loogu isticmaalo ama loo helo alaabta la gudbiyay ama laga warbixiya waa inuu wasiirku sidoo kele heli karaa.

(4) Wasiirku waa inuu xaqiijiyaa in alaabada loo gudbiyey dawladda ay tahay mid sir ah mudadda uu dhigayo xeer-nidaamiyuhu.

## Qodobka 61aad
## Dammaanado

Rukhsadlayasha iyo qandaraaslaha waa inay siiyaan wasiirka, xidhiidhka gudashada iyo dammaanad qaadka sida loogu baahdo si waafaqsan xeer-hoosaadka iyo shuruudaha rukhsada ama sahaminta iyo wadaagidda waxa-soo- saarka waafaqsan xeernidaamiye si loo hubiyo fulinta waajibaadyada ee rukhsadlaha iyo qandaraaslaha ama si uu u guto masuuliyadaha ka dhalanaya hawsha ku cad waa inay jiraan goob ammaan ah iyo si lo hubiyo waafaqsanaanta xeerka dhaqan-galka ah.

## Qodobka 62aad
## Masuuliyahadaha

(1) Rukhsadlaha iyo qandaraaslaha haysta rukhsad ama heshiiska sahaminta iyo wadaagidda wax-soo-saarka waxaa wadar ahaan ama keli keli ahaan ay masuul ugu yihiin dawladda, waajibaadyada ku saabsan ama ka dhasha ee la xidhiidha hawlaha shidaalka ee ku guda jira rukhsada ama heshiis goobeed.

(2) Rukhsadle kasta oo leh rukhsad ama qandaraasle heshiiska sahaminta iyo wadaagidda wax-soo-saarka,

waxaa uu wadar ahaan iyo keli keli ahaanba masuul ugu yahay dhinac saddexaad iyo si ku salaysan qiime hore loo sii gooyey oo uu ku leeyahay rukhsad layaasha kale isla rukhsadaas ama heshiiska sahaminta iyo wadaagidda wax-soo-saarka.

**(3)** Masuuliyadaha la xidhiidha dhinaca saddexaad ee uu galay qof fulinaya hawl rukhsadle ama qandaraasle kadib rukhsadlayaasha ama qandaraaslayaashu, waxay wadar ahaan iyo keli keli ahaanba masuul uga noqonayaan khasaaraha ama lumista uu sababay, dhib geystaha ama uu keenay qof kasta oo ku shaqaynaayay tilmaamo kasta iyo kormeerka rukhsadlaha ama qanadaraaslaha.

**(4)** Rukhsadlaha ama qandaraasluhu waxay masuul ka yihiin wasakh kasta ama waxyeelo lagu keenay ama ka imanaya hawlaha shidaalka iyo sidoo kale wasakhda ama khasaaraha ka imanaya hawlaha shidaalka ay qabteen qandaraasleyashu, qandaraaslaha hoose/labaad ama wakiil ama shaqaale rukhsadlahaas iyo qandaraaslaha. Waana inay qaadan dhammaan tallaaboooyinka lagu daweynayo wasakhda ama khasaare la sababay hababka la xidhhiidha dacwadaha iyo daw-baxa lagu sheegay xeer-nidaamiyayaasha.

## Qodobka 63aad
## Caymiska

**1.** Ruqsadlaha iyo qandaraaslaha ku gudo jira hawlaha shidaalka waa in ay caymis kaga jiraan shirkad layaqaano si waafaqsan xeerkan.

2. Caymisku waa inuu ugu yaraan daboolaa:
   b. Khasaaraha adeega/dhismaha.
   t. Khasaaraha wasakhda iyo masuuliyaddaha kale ee ku wajahan dhinaca saddexaad.
   j. Ka saarida wax-yaabaha la taaban karo iyo nadiifinta hadhaaga hawlaha shidaalka ama shilalka ee hadhaaga.

3. Rukhsadlaha iyo shaqaalaha qandaraaslaha ku hawlan hawlaha shidaalka.
4. Rukhsadlaha iyo qandaraasluhu waa inay hubiyaan in qandaraaslayaasha hoose uu u qaatay rukhsadluhu hawsha shidaalka, waa in ay si isku mid ah u caymiyaan shaqaalahooda, sida xadka rukhsadlaha u caymiyaan shaqaalahooda.
5. Wasiirku waxuu codsan karaa xog-kaydiyayaasha (dhukunmentiyada) ee heshiiska caymiska soona bandhigi karaa haddii loo baahdo caymis ka balaadhan ka jira ama bedeli karaa shuruudaha.

## Qodobka 64aad
## Qandraaslayaasha iyo Qandaraaslayaasha labaad

Rukhsadlaha ama qandaraasle waa in uu hubiyaa qof walba in uu gudanayo shaqada shirkada, ha ahaado shaqsi ama shaqaale la westeeyay ama mid soo maray qandaraasle ama qandaraasle hoose/labaad, waa inay u hogaansamaan qodobadda uu dhigay hawlaha shidaalka ee loogu talagalay Rukhsadlaha ama qandaraaslaha.

## Qodobk 65aad
## La noqosho

(1) Haddii ay dhacdo arimo khatara ama xad-gudub soo noqnoqday oo lagu sameeyey qodobadda xeerkan iyo

go’aanada dhaqan-galka ah, rukhsadaha ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista soo saarsita, wasiirku marka uu ka ansixiyo Golaha Wasiirada, waxaa uu go’aan ka qaadan karaa in uu gabi ahaanba ka noqdo heshiiska Sahaminta iyo wadaagida wax soo saarista ama wuu la noqondo rukhsada.

**(2)** Heshiiska sahaminta iyo wadaagida wax soo saarka ama rukhsada lala noqdo, kadib haddii rukhsadluhu ama qandaraasluhu uu kaco/la joojiyo, ama uu galo dayn ama dacwad kicid isla markaana rukhsad-layaasha kale ama qandaraaslayaal aanay awoodin inay la wareegaan in ay ka qayb qaataan danahaas.

## Qodobka 66aad
## Tababarka

**(1)** Rukhsadlaha ama qandaraasluha waa inay markay la tashadaan wasiirka, diyaariyaan oo hirgeliyaana si waafaqsan xeer-hoosaadyada iyo shuruudaha rukhsada ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka, qorshayaasha iyo barnaamijyada loogu talagalay in lagu tababarro shaqaalaha Somaliland ee dhammaan ka kooban qaybaha shaqada iyo dhammaan dhinacyada hawlaha shidaalka.

**(2)** Rukhsadlaha ama qandaraasle waa inuu marka uu fulinayo hawlaha shidaalka, diyaariyaa, hirgeliyaana qorshayaal loogu wareejinayo wasaaradda xirfada iyo aqoonta teknoolijiyada sare ee la xidhiidha hawalaha shidaalka, laakiin qodobkan looma

fasiranayo/isticmaali karo in lagu curyaamiyo rukhsadlaha ama qandaraaslaha, si ay u xafidnaato loolanka/booska tartan ee hawlaha shidaalka lafalgala heer caalamiyeed ama looga baahan yahay, Wasiirku waa inuu qaado tallaabooyin uu kaga hortegayo in aan loo adeegsan wareejinta farsamo, teknoolajiyad oo curyaamin ku keeni karta rukhsadlaha.

(3) Rukhsadlaha ama qandaraaslaha waa inuu siiyaa shaqaalaha dawladda tababaro shaqo sida ay dhigayaan xeer-nidaamiyayaasha.

## Qodobka 67aad
## Danta Dawladda

(1) Rukhsadlaha ama qandaraasle waa in uu si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha iyo shuruudaha heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka ama rukhsada, hubiyaa in fursad la siiyey shaqaalaynta shaqaalaha Somaliland ee leh khibrada loo baahan yahay ama shahaadooyinka heerarka kala duwan ee hawlaha.

(2) Rukhsadlaha ama qandaraasle waa in aanu ku hawlanaan dhaqan midab-takoor ku salaysan, jinsi, dhalasho ama shuruudaha jinsi ee adeegyada looga baahan yahay shaqaale.

(3) Qandaraasle ama rukhsadle waa in uu shaqaaleyaa shaqaale aan xirfad lahayn oo reer Somaliland ah oo keliya, haddii aanu si kale sheegin mucaahado caalami ah ama xeerka heshiiska xeer-nidaamiye.

**(4)** Rukhsadlaha ama qandaraasle, waa in uu sida ugu suurtagalka ah si waafqsan xeer-nidaamiyayaasha iyo rukhsada ama heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarista, adeegsan karaa adeegyo waddani ah ama lagu sameeyay Somaliland, laakiinse waa inay adeegyadda, agabka, xirfadaha muwaadiniinta tayo ahaan la mid yihiin, alaabada iyo adeegyadda kala duwan ee dibeda laga keeni lahaa, ama aanay khatar ku ahayn caafimaadka, amniga iyo xeerarka deegaanka.

## Qodobka 68aad
## Shuruudaha shirkadaha

Qandaraasle ama rukhsadle agab ee aan ku lammaanayn/tirsan Somaliland gudaheed waa in uu:

**(1)** Iska diiwaan geliyaa Somaliland shirkad ahaan si ay uga fuliyaan hawl shidaal uun la xidhiidha heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo- saarka ama rukhsad lagu siiyey sida ku cad xeerkan. Waana in shirkadaasi dhinac ka tahay heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax-soo- saarka ama rukhsad haysataa.

**(2)** Waa in uu u joogaa Somaliland wakiilka leh awood uu kaga fuliyo hawlo shidaal dalka gudihiisa isla markaana uu geli karo heshiis dhaqan-gal ah, isaga oo ka wakiil ah qandaraaslaha ama rukhsadlaha, shuruudaha oo faahfahsan waxaa lagu qeexi karaa codsiga dheeraadka ah ee kayd qoraalada ama xeer-nidaamiyayaasha.

**(3)** Waa in wakiilku diiwaan geliyaa waraaqaha qoraalka ah ee hay'adu/shirkadu haysato ee leh

heerka farsamo ee lagama maarmaanka ah, halbeegyada bedqabka caafimaadka iyo deegaanka iyo awood maaliyadeed oo ay ku fulinayso hawlaha shidaalka ee xuduuda gudaheeda iyo lakabka hoose ee bada dawladda.

**(4)** Arrinta la xidhiidha hawlahaas shidaal, waa inay uga furaan xisaab isla markaana ku ilaaliyaan bangiga hab cad oo uu aqbalay wasiirku.

**(5)** Waa inaanay ku hawlanayn hawl musuqmaasuq isla markaana hantideeda iyo xisaabeedkeedu si buuxda ugu daah-furan yihiin wasiirka, la taliyayaashiisa iyo Hanti-dhowrka Guud.

## Qodobka 69aad
## Nidaaminta kormeerka iyo Daboolida Kharashka

**(1)** Wasiirku wuxuu awood u siin karaa sarkaal inuu kormeero, tijaabiyo, hanti-dhawro sida ugu haboon hawl kasta oo shidaal si loo xaqiijiyo hawlaha shidaalka in loo fuliyo si waafaqsan xeerka dhaqangalka ah, xeerkan iyo xeer-nidaamyada si waafaqsan shuruudaha iyo xaaladaha khuseeya rukhsada ama heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax soo saarka.

**(2)** Qof kasta oo uu awood u siiyey Wasiirku sida ku cad faqradda (1aad) ee qaybtan xaq wuxuu u leeyahay wakhtiga macquulka u ah:.

**b.** Inuu galo goob kasta, qaab dhismeed, gaadiid, rakibaad, doon, markab, diyaarad, alaabo/adeegyo,

xafiisyo ama dhismayaal uu isticimaalayo rukhsadle, ama qandaraasle hawlo shidaal wadaa;

**t.** Kormeeraa, tijaabiyaa, hanti-dhowraa, sida ugu haboon, shaqo, qalab,macluumaad, walxo, hawlo iyo buugag maaliyadeed ee xisaabeed, raad-raacyo, diiwaanno rukhsadle ama qandaraasle la xidhiidha ama loo isticimaalay hawlaha shidaalkaas;

**j.** Ka qaadaa, meesha ka saaraa iyadoo looga golleeyaha lafagur ama tijaabo muunad uu leeyahay shidaal, biyo ama wal-xaha kale ee ka yimi ceelka;

**x.** Kormeeraa, kasoo saaraa halkaas, nuqulna ka sameeyaa waraaqo qoraal oo la xidhiidha hawlgal-kaas iyo;

**Kh.** In uu sameeyo baadhida iyo weydiimaha sida ugu suurtogalka ah ee lagu hubinayo in qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaasha loo hogaansamay.

**(3)** Rukhsadle ama qandaraasle waa inuu siiyaa qof kasta oo uu awood u siiyey Wasiirku sida ku cad faqrada sare, dhammaan adeegyada macquulka ah ee uu u baahanyahay, si uu u guto hawshiisa, kana caawiyaa si ay ugu sahlanaato gudashada kormeerka mudaysan ee shaqada sida ku cad qodobkan.

**(4)** Xukuumaddu waxay codsan kartaa in kharashaadka lagu hagayo kormeerka hawlaha shidaalka si waafaqsan qodobkan uu u daboolo rukhsadluhu ama qandaraasluhu ama dhinaca uu kormeerku ku waajihanyahay ama goobtuu ka dhacayo.

**(5)** Xukuumadu waxaa iyada oo xeer-nidaamiye cuskanaya uga dalban karaa qandaraaslaha iyo

rukhsadlaha fulinaya hawlaha shidaalka kharashka maamul ee ku salaysan hawl sannadeedka ajuurada iyadoo xisaabinta ajuuradda loo raacayo xeernidaamiye.

## QAYBTA 5AAD
## QODOBADA CIQAABTA

### Qodobka 70aad
### Ciqaabaha Xeerka Shiidaalka

Iyada oo waxba loo dhimayn Xeerka ka hortagga ku Takrifalka hantida Qaranka Iyo La dagaalanka Musuq-Maasuqa**:**

1. Qof kasta oo hor istaaga ama dhibaateeya ruqsadle ama qandaraasle gudanaya hawlaha shidaal ee ku xusan qodobada xeerkan, shaqaalihiisa ama cid uu u wakiishay si waafaqsan xeerka, isaga oo qandaraaslahaas ama ruqsadlahaasi isticmaalaya xuquuq kasta, awood ama xoriyad uu ku helay ruqsadaas ganacsi waxa uu galay danbi waxaana lagu Ganaaxayaa xadi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 5,000 US$ (Shan kun US Dolar) iyo xabsi sannad ah.ama waa laysugu darri karaa labada.
2. Qof kasta oo:-
    - b. Hawlo shiidaal ka fuliya guddaha Somaliland isaga oo aan ogolaanshiiyo ka haysan Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta
    - t. Ka Sameeya Guddaha Somaliland Sahamin Shiidaal isaga oo aan haysan Ruqsad sahamineed

j. Sameeya, isaga oon ruqsad u haysan, hawl kasta oo qabashadeedu ruqsad u baahantahay sida ku xusan Xeer-nidaamiyayaasha Xeerkan
x. Waxa uu galay danbi waxaana lagu ganaaxayaa xaddi lacageed Somaliland shilin ah oo u dhiganta 500,000 US$ (Shan boqol oo Kun US Dolar) iyo Xabsi aan ka badnayn 10 sannadood kana yarayn 3 sannadood ama waa laysugu darri karaa labadaba.

3. Qof ka ay Maxakamadi ku hesho inuu galay danbiyada ku xusan faqradaha 1aad ama 2aad ee Qodobkan ee la xidhiidha shidaal ama wax-soo-saar shidaal, marka la mariyo ciqaabaha ku xusan faqradaha kala duwan ee Qodobkani sheegayo, waxay maxakamadu amraysaa:
   b. In dawladu La wareegto shidaalka ama Wax-soo-saarka shidaalka
   T. In qof kaasi dawladda siiyo qiimaha shidaalka ama wax-soo-saarka shidaalka ee uu ku takri falay.

4. Cid kasta oo hawlo shidaal u sameeya si baal marsan Sharcigan iyo xeer-nidaayiyaashiisa waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxayaa xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 50,000 US$ (konton Kun US Dolar) ama xabsi aan ka yarayn hal sanno, kana badnayn saddex sanno ama labadaba waa laysugu dari karaa.
5. Cid kasta oo sameeya qorshe wax-soo-saar u diyaarin goobeed iyo hawlgelin isagoo aan ogolaansho ka

haysan wasaaradda waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxaya xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 1,000,000 US$ (Hal milyan US Dolar). Mudada uu hawlgalku socdona waxa uu bixinyaa xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 200,000 US$ (laba boqol kun US Dolar) maalin walba oo hawgalka aan la ansixini uu sii socdoba.

6. Cid kasta oo aan u soo gudbin qorshaha xidhitaanka goobta sida uu dhigayo qodobka 40aad waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxaya xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 50,000 US$ (konton Kun US Dolar) maalin walba oo ka bilaabanta dhamaadka mudadda ay ahayd in lagu soo gudbiyo qorshaha xidhitaanka goobta.
7. Cid kasta oo ku guuldaraysta bixinta macluumaadka/xogta sida uu Sharcigani u waajibinayo waxa uu galay denbi, waxaana lagu ganaaxaya xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 20,000 US$ (labaatan Kun US Dolar). Waxaa kale oo uu bixinayaa xaddi lacageed oo Somaliland shilin ah oo u dhiganta 2,000 US$ (laba Kun US Dolar) maalin kasta oo macluumaadkaas/xogtaasi aan la bixin.
8. Denbiyada uu shakhsi galo isaga/iyada oo wakiil ka ah shirkad ganacsi ama hay'ad sharciyaysan, ganaaxyada iyo xukunka ka yimaada denbiyadaas waxa lagu soo rogayaa shirkaddaa ganacsi ama hay'adaa iyo/ama guddigeeda fulinta.
9. Denbiyada ay gasho shirkad ganacsi ama hay'ad sharciyaysan, waxaa loo aqoonsanayaa inuu

dembigaa galay agaasimaha ama qofka maamula shirkaddaa ganacsi ama hay'adaa, ilaa haddii mooyee

b. Qofkaasi sameeyey taxadar ah in aan dembigaasi dhicin
t. Dembiga la sameeyey aanu ogayn, ogolaan ama aanu qofkaasi door ku lahayn

## Qodobka 71aad
## Xeer-nidaamiyayaal Guud

Wasiirku wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiye qeexaya dhammaan arrimaha xeerkani uu waajibiyay, inay ku habboon-tahay, daruuri tahay ama ogolaaday in laga soo saaro si loo fuliyo ama si buuxda loo dhaqan galiyo xeerkan.

## Qodobka 72aad
## Tilmaamid khaas ah

Iyada oo aan lagu xadgubayn guud ahaanshaha Qodobka 71aad, Wasiirku wuxuu soo saari karaa xeer-nidaamiyayaal la xidhiidha:

1. Hubinta dhisme bedqaba, dayac tirka iyo hawlaha rakibida iyo adeegayda loo isticimaalayo hawlaha la xidhiidha shidaalka;

2. Amniga, caafimaadka iyo daryeelka shaqaalaha hawlaha shidaalka iyo guud ahaan talaaboyinka amni ee lagama maarmaanka ah;

3. Ka hortaga wasakhawga iyo ka qaadida tallaabada lagu hagaajinayo ee la xidhiidha wasakhow kasta oo ka dhici kara goobaha shidaalka;

**4.** Kormeerka goobaha hawlaha shidaalka laga fuliyo iyo agab kasta, wershad, mishiin iyo agabka e ku guda jira goobahaas;

**5.** Warbixinta iyo baadhista shilalka ka dhasha hawlaha shidaalka;

**6.** Illaalinta, kormeerka iyo raad-raaca, xisaabaadka, tiro koobka iyo qorshayaasha la xidhiidha hawlaha shidaalka,

**7.** Dhammaadka qaybaha goobaha heshiiska ee waafaqsan heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax-soo -aarista;

**8.** Illaalinta xuquuqaha daaqa, kaluunka, hawlaha dhaqaale iyo kuwa aan ahayn dhaqaalaha ee laga fuliyey gudaha ama goob kasta o u dhow goobaha hawlaha shidaalka laga fulinayo;

**9.** Samaynta iyo soo gudbinta warbixinta, faa'iidooyinka iyo barnaamijyada;

**10.** Hawlaha dhaqdhaqaaqa gaadiidka;

**11.** Hadadka ajuuradda iyo xuquuqaha lagu bixinayo hawlaha shidaalka, hababka isugeynta ajuuradda iyo xuquuqaha gaar ahaaneed iyo hababka iyo wakhtiyda lacag bixinta halkaas;

**12.** Khariirada tixraaca ee baloogyada iyo hagayaasha ee tirida baloogyada ugu sareeya ee uu haysan karo qandaraasle leh, rukhsad ama heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax-soo-saarka;

**13.** Habraacyada codsidyada heshiiska Sahaminta iyo wadaagista wax-soo- saarka;

**14.** Go'aaminta qiimaha shidaalka;

**15.** Waajibinta in rukhsadle kasta iyo qandaraasle kasta usoo gudbiyo wasiirka barnaamijkooda maalgalineed;

**16.** Xafidaada khayraadka dabiiciga ah iyo ka ilaalinta wasakhda degaanka, ha ahaato mid shidaal ama mid kale.

**17.** Hababka xisaabaadka ee la raacayo iyo warbixinada ku saabsan hawlaha shidaalka;

**18.** Xaaladaha ugu yar ee ay ku shaqayn karaan shaqaalaha ku hawlan hawlaha shidaalka;

**19.** Faah-faahin dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha laga wada hadli karo iyo kuwa aan laga wada hadli Karin ee heshiiska sahaminta iyo wadaagista wax-soo -saarka ee xeerkani dhigayo;

**20.** Qiimaha iyo hababka go'aaminta qiimaha ee shidaalka iyo biyaha ee laga soo saari karo ceel ama kayd shidaal si waafaqsan ogolaanshaha wax-soo-saarka;

**21.** Hababka la isiticimaalayo ee ku saabsan cabirka shidaalka, biyaha iyo wal-xaha kale ee laga soo saaro ceelasha iyo cabiraadaha kale ee qiimaha isugaynta iyo ujeedooyinka qiimaynta;

**22.** Cabirka cadaadista ee ku jira gudaha ama dib u cadaadiska, kaydka shidaalka ee goobta la isiticaamlayo iyo dib ugu shubida shidaalka;

**23.** Goobaha cayiman ee adeegsiga xuquuqaha ee rukhsadle ama qandaraasle sida ku cad xeerkan si loo fuliyo hawlaha shidaalka waa in la xadeeyaa;

**24.** Codsi ku saabsan bixinta iyo ogolaanshaha ceel qodista;

**25.** Hawlaha qodista iyo calamadaynta ceelasha iyo godadka ceelasha;

**26.** Hawlaha Baadhida iyo Sahaminta iyo fulinta shaqada la xidhiidha ujeedooyinkaas;

**27.** Hawlaha so saarista iyo fulinta shaqada ee arintaas;

**28.** Qaabka canshuuraha ee dhuumaha, adeegga kaydka xaqa dhinaca saddexaad ee adeegyada;

**29.** Samaynta, xafidida iyo xaalada xudunta u ah awodaha, jarista, muunada iyo agabka kale ee laga helay hawlaha shidaalka;

**30.** Tijaabinta nooc kasta oo ku saabsan shidaalka;

**31.** Warbixinta iyo adeegsigga loogu talagaly ogolaanshaha qiiqa ama uumiga qabow;

**32.** Dhammaadka hawlaha shidaalka, kala saarida agabka iyo dejinta dakhliga kala saarida.

**33.** Ganaaxyada dembiyada ka dhanka ah xeer-nidaaamyaha.

## Qodobka 73aad
## Nasakhaad

Xeerkani wuxuu laalayaa dhammaan xeerarkii ka horeeyay ee Shidaalka iyo wixii la halmaala.

## Qodobka 74aad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan-galayaa marka ay Golayaasha xeer-dejintu ansixiyaan Madaxwaynuhuna saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

______________________________

**Md. C/risaaq Khaliif Axmed**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

______________________________